MAJALADDA MARAG
Cadadka 13-aad | April 2026

# MUTAYSI:
## MIID AYSAN SOOMAALIDU MUUDSAN

Bashiir Suuley

Bogga: 19





Xigashada Sawirka: AI

# Qorayaasha Majaladda


**Mustaqbalka Baydhabo:** Maxaa Ka Dhalan Kara Isbeddelka Maamul?
Maxamed Xasan Cirro — 4


**HESHIIS BULSHO CUSUB: FURAHA MUSTAQBALKA DOWLADNIMO EE SOOMAALIYA**
Dr. Maxamuud C/Raxmaan — 7


**Dhitadu waa dhallinyarada:** Faya-dhowrka faca soo aaddan
Cabdiweli Axmed Muumin — 13



**QAADKA IYO SAAMAYNTIISA BULSHADA:** dhibaatada taagan iyo baahida wacyigelineed
Dr. Cabdinaasir Jaamac Warsame — 16


**Mutaysi:** Miid Aysan Soomaalidu Muudsan
Bashiir Suuley — 19


**Puntland:** Caqadaha Hortaagan Ka-gudbidda Nidaamka Qabiilka iyo Higsiga Dawladnimo ku Dhisan Hay'ado (Institutionalization)
Zakaria Xaaji Axmed Iley Rabiica — 22


**Dib-u-Milicsiga Taariikhda Soomaaliyeed:** Shiikh Cabdulcasiis Al-Maqdishawi
Dr. Cabdiraxmaan Baadiyow — 25


**Khayraadka Kalluumaysiga Soomaaliya:** Maxaa ka hor taagan ka faa'iidaysigiisa, maxaase fursado ah oo jira?
Axmed Siciid Awnuur — 28


**Dhaqan-Siyaasadeedka Soomaalida:** Isdhexgalka Qabiilka, Xeerka iyo Dawlad-dhiska Casriga ah
Dr. Maxamed Cali Faarax — 33


**ISKU-DHAFKA WAXBARASHADA IYO TIKNOOLOJIYADDA:** QAAB-DHISMEED LAGU HORUMARIKARO WAXBARASHO WAX-KU-OOL AH
Cabdiraxmaan Maxamuud Saciid — 37

# Dhambaalka Tifaftiraha

Waxaa farxad iyo bogaadin mudan in aan soo saarno cadadka 13-aad ee Majalladda Marag, oo ah madal warbaahineed oo loogu talagalay in lagu daabaco macluumaad kala duwan sida warbixino, falanqayno, iyo aragtiyo ay diyaariyeen dad kala duwan oo ka tirsan bulshada, sida cilmi-baarayaal, suxufiyiin, aqoonyahano, hal-abuurro, iyo dadka kale oo khibrad iyo aqoon u leh dhinacyada kala duwan ee taabanaya nolosha bulshadeena.

Ujeeddada majalladdan waa in la helo madal ka duwan warbaahinta caadiga ah ee dalka ka jirta, kuwaas oo inta badan xoogga saara soo tebinta dhacdooyinka maalinlaha ah. Majalladdan waxay hiigsaneysaa inay bulshada u gudbiso macluumaad dhigaal noqda, waxtar leh oo kor u qaada wacyiga iyo fahamka bulshada, kobciya doodaha iyo aragtiyaha caafimaadka qaba, soo bandhiga dhaliilo wax dhisaya oo daahfuran, islamarkaana dhiirrigeliya bulshada gaar ahaan dhallinyarada, si ay u noqdaan kuwo xog ogaal ah, si buuxda u fahma xaaladda dhabta ah, una gaari karaan go'aammo sax ah oo noloshooda iyo bulshada wax ku ool u ah.

Majaladdan waxay ka madax-bannaan tahay aragtiyaha siyaasadeed ee kala duwan ee dalka ka jira, waxayna u furan tahay qof walba oo doonaya in uu la wadaago bulshada fikrado, warbixino, iyo falanqeyn ku saleysan aqoon iyo waayo-aragnimo.

Cadadkan qormooyinka xiisaha leh waxaa ka mid ah: Mustaqbalka Baydhabo maxaa ka dhalan kara?, Heshiis bulsho cusub: furaha mustaqbalka dowladnimada Soomaaliya, Dhidatu waa hdallinyarada, Qaadka iyo Soomaalida, Mutaysi miid aysan Soomaalidu muudsan, Puntland iyo caqabadaha ka hortaagan ka gudbidda nidaamka qabiilka, iyo khayraadka kalluumaysiga Soomaaliya.

**Cabdi Cumar Bile**
Tifatiraha Guud

# MUSTAQBALKA BAYDHABO: MAXAA KA DHALAN KARA ISBEDDELKA MAAMUL?



Maxamed Xasan Cirro




Xigashada Sawirka: SNTV

Bishii Maarso 30, 2026, ciidamada Dowlada Federaalka Soomaaliya ayaa xoog ku galay magaalada Baydhabo, waxayna xukunka ka tuureen madaxweynihii maamulka Koonfur Galbeed Cabdicasiis Xasan Laftagareen.

Qabsashada Baydhabo ee dowladdu waxay furtay doodo cusub oo la iska weydiinayo arrimaha rasmiga ah ee ku hoos duugan jihada ay qaadayso siyaasadda federaalka Soomaaliya, waxaana soo baxaysa doodo sheegaya in qorshaha dowladdu yahay inay soo ururiso nidaamkii heerarka dowladda ee kala madax banaanaa ee ku dhisnaa hanaanka federaalka.

Khilaafka dowladda federaalka iyo maamulkii Cabdicasiis Laftagareen wuxuu ka dhashay markii madaxweynihii xilka laga tuuray Cabdicasiis uu ka hor yimid qorshaha xukun ee madaxweyne Xasan Shiikh Maxamuud iyo wax ka bedelka dastuurka, kadibna uu muddo gaaban ku qabsaday doorasho siday u dhacday iyo hannaanka loo maray uusan caddayn, waana arrinta soo dedejisay in dowladdu adeegsato awood ciidan.

Soo gelitaanka ciidammada dowladda ee Baydhabo waxa ay abuurtay jaahwareer amni iyo maamul, waxaa hal mar meesha ka baxay nidaamkii iyo kala danbayntii, waxaana burburay maamulkii dhisnaa, xafiisyada hay'adaha dowladda qaarkood waxaa loo geystay bililiqo, iyadoo dowladda federaalku aysan la imaan miyir qab la xiriira maaraynta isbedelka maamul, halka ay ku mashquushay arrimaha siyaasadda iyo kala xallinta xubnaha isku haysta cidda noqon doonta madaxweynaha Koonfur Galbeed, waxaana arrimahaan ka dhashay habacsanaan amni oo keentay in hay'adihii gargaarku amraan in shaqaalahoodu degdeg uga baxaan Baydhabo.

Habka duullaanka dowladda waxaa ka muuqatay in ay cashar ka baratay sumcad xumadii kaga dhacday weerarkii sanadkii hore ay ku qaadday maamulka Jubbaland, ayna ciidamo ku geysay deegaanka Raaskambooni, halkaas oo dagaalladii ka dhacay dowladda lagu soo jebiyey, iyadoo dowladdu guul darradaas maanka ku hayso waxa ay ku dedaashay in awood xad dhaaf ah ay isugu geyso in ay Baydhabo qabsato, taasoo u dhacday sidii ay doonaysay, ayna ku heshay xoogaa naruuro ah oo ay isaga dhaqday guuldaradii hore. Waxay ciidamada dowladdu galeen Baydhabo, iyadoo inta u dhaxaysa Muqdisho iyo Baydhabo, iyo dhul badan oo gobolladda Koonfur Galbeed ka tirsan ay weli gacanta ku hayaan maleeshiayada Al-Shabaab. Dagaallada iyo dhul kala qabsiga dhex maraya hay'adihii dowladda ayaa siinayaa fursad ay ku sii awoodaystaan Al-Shabaab.

Ciidammadii maamulkii laga saaray magaalada ayaa ku sugan duleedka galbeed ee Baydhabo, iyagoo aan ilaa hadda qorshahooda rasmiga ahi caddayn. Dhinaca gudaha magaalada, bulshadu waxay u kala shirayaan beelo, waxaana muuqata aragtiyo awood doonis ku dhisan qabaa'il oo is dhinac ordaya, arrimahan oo muujinaya in ay jirto khatar isku dhacyo ku salaysan is kooxaysi iyo qabiil oo ka dhex ooganta bulshada reer Koonfur Galbeed.

## CABSIDA MACALUUL DHACDA

Taariikh ahaan, gobolladani waxay lahaayeen duruufo kala duwan. Xilligii gumaysiga, dhulka Mirifle wuxuu ka tirsanaa gobolkii loo yaqaanay Jubadda Sare, halka Shabeellaha Hoose uu ka mid ahaa dhulkii Banaadir. Qaab-dhismeedka bulshada ku nool deegaannadan wuxuu isugu jiraa beeraley, xoolo-dhaqato, kalluumaysato iyo ganacsato. Awooddooda dhaqaale waxay ku tiirsan tahay tacabka shaqo iyo wax-soo-saar. Mar kasta oo ay dhacaan xasillooni darro iyo firaaq maamul, waxay si toos ah khatar ugu yihiin awoodda dhaqaale ee bulshada.

Iyadoo weli bulshada caalamka iyo dadka Soomaaliyeed ay xusuusan yihiin dhibaatadii weynayd ee ka dhacday gobolladan tan iyo burburkii dowladnimada, gaar ahaan macaluushii ba'anayd ee sanadkii 1992-kii. Markii uu burburay nidaamkii dowladeed, kooxihii dagaallamayey waxay u geysteen dhac iyo boob shacabka, taasoo sababtay in magaalada Baydhabo loo bixiyo "hoygii geerida" ee macaluushu keentay. Muuqaalladii iyo sawirradii laga qaaday dadkii darxumaysnaa ayaa dunida si weyn uga argagax geliyey.

Isla digniinta in macaluuli dhici karto waxa soo saaray Golaha Federaalka Koonfur Galbeed oo ah gole sheegay in uu u taaganyahay difaaca dhulka dadka Koonfur Galbeed. Warsaxafadeed ay soo saareen 18 April 2026, wuxuu ku sheegay "Golaha wuxuu si adag u taageersanyahay nidaamka federaalka ee dalka. Sidoo kale, Goluhu wuxuu ku baaqayaa in Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay si buuxda ugu dhaqanto dastuurka, shuruucda, iyo qawaaniinta dowladnimo". Golaha ayaa warsaxafadeedka ku

cadeeyay inuu diyaar u yahay inuu dadkiisa iyo dhulkiisa ku difaaco si waafaqsan sharciga, isla markaana haddii nidaamka sharcigu shaqayn waayo, la qaado tallaabooyin lagama maarmaan ah oo lagu badbaadinayo shacabka, si looga hortago in mar kale la arko musiibo la mid ah tii dhacday 1992-dii oo Baydhabo ka dhigtay “City of Death.”

Hay’adaha gargaarka ayaa si gaar ah isha ugu haya xaaladda gobolladan. Firaaqa maamul iyo isbeddelka hadda dhacay wuxuu mar kale dunida xusuusinayaa halista macaluul ee ka dhalan karta amni darrada iyo maamul la’aanta. Magaalada Baydhabo keligeed waxaa ku yaalla xeryo ay deggan yihiin dad gudaha ku barakacay, kuwaas oo ay barakiciyeen abaaro iyo colaado. Tirada xeryaha dadka gudaha ku barakacay ee Baydhabo ku yaalla waxay ka badan tahay laba boqol oo xero, taasoo ka dhigaysa magaalada meesha ugu badan ee xeryaha barakacayaashu ku yaallaan. Dadkaasina waxay si weyn ugu tiirsan yihiin taageerada ay bixiyaan hay’adaha gargaarka.

Waxaa si dhow isha loogu hayaa sida dowladda Soomaaliya u maaraynayso xilliga kala guurka iyo qorshaha ay la timaaddo, si xal loogu helo damacyada iska soo horjeeda ee kooxaha awood doonka ah.

Dowlad goboleedka Koonfur Galbeed wuxuu ka kooban yahay saddex gobol: Bay, Bakool iyo Shabeellaha Hoose. Bulshada degganna inta badan waa Digil iyo Mirifle. Bulshada Digil waxay degtaa gobolka Shabeellaha Hoose iyo degmada Diinsoor ee gobolka Bay, halka bulshada Mirifle ay degaan gobollada Bay iyo Bakool.

**W/Q:** Maxamed Xasan Cirro



# HESHIIS BULSHO CUSUB:

## FURAHA MUSTAQBALKA DOWLADNIMO EE SOOMAALIYA



Dr. Maxamuud C/Raxmaan



# HORDHAC

Taariikhda dawladaha casriga ah waxay muujinaysaa in marxaladaha kala-guurka ahi ay yihiin kuwa ugu khatarta badan uguna adag in dhakhso looga gudbo. Soomaaliya maanta waxay ku jirtaa xaalad kala-guur iyo marxalad u dhaxaysa burburkii dawladnimo ee 1991 iyo isku dayga dib-u-dhis soo jiitamayey tan iyo sanadihii 2000-meeyadii (~25 sano). Inkastoo la dhisay hay'ado dowladeed, la qabtay doorashooyin dadban, lana helay aqoonsi caalami ah, haddana waxaa dhegaha bulshada ka guuxaya su'aasha masiiriga ah ee: ma jirtaa dowladnimo si dhab ah loo wada aqbalay ama loo wada leeyahay?

Qoraalo-cilmiyeedka ku saabsan dawladaha nugul (fragile states), waxay tilmaamayaan in dowladuhu ay fashilmaan marka saddex arrimood ay is biirsadaan: awood la'aan hay'adeed, kalsooni darro bulsho, iyo khilaaf ku saabsan sharcinimada hay'adaha dawladda (legitimacy). Waxaa cad in saddexdaan arrimoodba ay hadda jiraan marka loo kuurgalo xaaladda hadda Soomaliya ku sugantahay. Hay'adaha dowladdu waa kuwo dhisan laakiin aan si buuxda u shaqayn. Waxaa hadda soo afjarmay muddo-xileedkii xukuumada iyo barlamaanka oo ku kala eg 15 May 2026 iyo 14 April 2026, sida ay u kala horreeyaan. Bulshada qaybaheeda kala duwan ee ku kala dhaqan gobollada ee deegaamada dawladaha xubnaha ka ah Federalka ma wada aaminsana hal nidaam iyo hal sharciyad oo la isku waafaqsanyahay. Sharcinimada dowladdu waxa ay ku xirantahay heshiisyo siyaasadeed oo is beddela lana wada aqbalo ama loo hoggaansanyahay fulintooda.

Marka la eego aragtida xaaladda kala-guurka (Critical Juncture Theory) ee cilmiga siyaasadda, marxaladaha noocan ah waxay noqon karaan kuwo horseeda laba jid: mid keena xasillooni waarta iyo isfahan qaran ama mid sii xoojiya kala daadsanaanta, khilaafka iyo burburka siyaasadeed ee dalka. Sidaa darteed, Soomaaliya maanta ma aha oo keliya meel ay ka jirto dhibaato, balse waa meel ay ka jirto fursad taariikhi ah haddii looga faa'iidaysto sida saxda ah, danta qaranka iyo danta guudna laga hormarinayo danaha deegaamada, reernimada iyo damacyada gaarka ah ee siyaasadeed. Xilliga xaalada kala-guurka waa waqti xasaasi ah oo la hirgelin karo isbeddel dhab ah iyo dhaq-dhaqaaq bulsho isbedel doon ah.

# MAXAA GUNDHIG U AH DHIBAATADA BULSHO IYO SIYAASADEED?

Marka si qoto dheer loo falanqeeyo arrimaha murugsan ee siyaasadda, waxaa la oran karaa gundhigga khilaafka is-mariwaaga joogtada noqday wuxuu salka ku hayaa ama ku saabsanyahay fahanka laga haysto iyo qaabka dowladnimada, ee ma aha oo keliya cidda talada qabanaysa. In la iswaydiiyo fahamka dhabta ee laga haysto dawladnimada sida loo xaqiijin karo waa arrin muhiim ah oo badanaa la iska indho-tiro marka la samaynayo falanqaynta maalinlaha ah ee siyaasadda.

Aragtida heshiiska bulshada (Social Contract Theory) waxay qeexaysaa in dowladnimadu ku dhalato heshiis ay bulshada ku oggolaatay inay ka tanaasusho qaar ka mid ah xorriyadeeda si loo helo amni iyo nidaam. Soomaaliya, heshiiskan wuxuu burburay 1991-dii, waxaana ilaa hadda socda isku day lagu dhisayo mid cusub. Si kasta oo la iskugu dayay laga soo bilaabo shirkii Carta, Jabuuti sanadkii 2000, haddana weli ma hirgelin ama lama helin heshiis bulsho oo cusub, laguna wada qanacsanyahay ama diyaar loo yahay in bulshadu ka tanaasulaan qayb ka mid ah xorriyadooda si uu u dhaqangalo nidaam dawladnimo lagu helo amni iyo kala dambayn. Waxaa loo tiirin karaa helitaan la'aanta heshiiskaas dhowrka arrimood ee soo socda:

- Qeexid cad oo aan weli laga bixin ama la isku raacsanayn wixii ku saabsan awoodda dawladnimo iyo sida loo hananayo: yaa go'aaminaya siyaasadda guud?
- Hab sharciyeed lagu xalliyo khilaafaadka oo aan weli jirin ama aan muuqan sidii loo hirgelin lahaa. Ma jirto maxkamad dastuuri ah ama la damacsanyahay in la dhiso oo kala saarta khilaafka siyaasadeed ee caadada noqday iyo ishaynta joogtada ah ee dawladda dhexe (DFS) iyo dawladaha xubnaha ka ah (DXF).
- In aysan jirin kalsooni bulsho oo ka sarreysa qabiilka iyo deegaanka. Tasarufaadka siyaasiyiinta, hoggaamiyaasha bulshada iyo weliba haldoorka bulshada weli kuma guulaysan in bulshada la baro wadaninimada iyo in abtirsiga qaranimo ka mudan yahay ama ka horreeyo tan qabiilka ama deegaanka.

Cilmi-baarisyo badan waxay muujinayaan in haddii aan la isku raacsanayn macnaha iyo fahamka dowladnimada uuna hooseeyo wacyiga bulshada ay ka qabaan dawladnimada in ay horseedi karto waxa loo yaqaan isdiido qaranimo (contested sovereignty),

taasoo keeni karta in qaybo kala duwan oo bulshada ah iyo deegaanno ka mid ah dalka aysan si buuxda u aqoonsanayn awoodda xarunta dhexe ama awoodaha darafyada kala duwan. (Mansur, 2023).

Tusaale ahaan, murannada ku saabsan wax-ka-beddelka dastuurka iyo habka doorashooyinka waxay muujinayaan in aan la isku raacsanayn xeerarka ciyaarta siyaasadeed. Marka xeerarka laftoodu lagu muransanyahay, nidaamka oo dhan wuxuu noqdaa mid nugul.

## SIDEE LAGU HELI KARAA ISBEDEL BULSHO?

Si loo fahmo sababta iyo duruufaha keenaya in Soomaaliya ka gudubto xaaladdan kala-guurka iyo ishaysadka soo noqnoqda, waxaa muhiim ah in la adeegsado aragtiyo cilmiyeed sharaxaya sida isbeddel bulsho u dhaco iyo sida lagu hirgelin karo.

Aragti cilmiyeedka abaabulka khayraadka (Resource Mobilization Theory) waxay tibaaxaysaa in dhaqdhaqaaqyada bulshada ee guulaysta ay ku tiirsanyihiin awood-abaabulka khayraadka (lacag, waqti, xirfad, dad aqoon iwm.). Daraasado laga sameeyey dhaqdhaqaaqyada isbedel-doonka ee caalamka sida: dhaqdhaqaaqa xuquuqda madowga ee Maraykanka (USA Civil Rights Movement) iyo kacdoonnadii Carabta (Arab Spring) waxay caddeeyeen in abaabulka dhaqaale, aqooneed iyo mid shabakadeed (isku-xirnaan) uu yahay furaha guusha keenta kacdoon isbedel ee bulshada. Ilaa iyo imminka ma jiro ilo dhaqaale, aqooneed ama shabakadeed oo ka shaqeeya sidii loo hirgelin lahaa ama abuuri lahaa kacdoon isbeddel togan ee bulshada Soomaalida. Waxaa jira dhaqaale xooggan oo ay bixiyaan dalalka daneeya siyaasadda Soomaaliya oo ujeedkeedu tahay sidii saamayn ama faragelin dadban iyo mid toos ahba loogu samayn lahaa siyaaasadda dalka looguna jihayn lahaa ama loo soo saari lahaa cid iyagu ay wax u yeeriyaan (Proxy Puppets). Faragelinadaani waxay sii murgiyeen in la helo isbeddel togan ee bulsho iyo in waddanku aado jiho sax ah. Waxaa kale oo ay ka dhigaysaa dalka meel lagu loollamo loona adeegsado dagaalka juqraafi-siyaasadeedka ee Geeska Afrika iyo Bariga Dhexe.

Labada aragti-cilmiyeed ee aragtida hanaanka siyaasada (Political Process Theory) iyo aragtida ra'yi-suuraynta (Framing Theory), waxay iyaguna tilmaamayaan in dadku aysan ku hawlgelin xaqiiqooyinka jira ee ay ku duulaan hadba sida loogu sharraxo xaqiiqooyinkaas iyo fahamka ay ka haystaan. Tusaale, doodaha siyaasadeed ee ka jira dalka waxaa had iyo jeer lagu fasiraa in ay ku salaysanyihiin qabiil iyo dano gaar ah taas oo ka hortagaysa in la abuuro aragti qaran iyo mid dan guud.

Su'aasha iswaydiinta mudan waxay tahay: side loo heli karaa isbedel bulsho keeni kara isbedel wax ku ool ah?

Iyadaoo laga faa'iidaysanayo aragti-cilmiyeedyada cilmiga bulsha kor ku xusan, waxaa la oran karaa, waxaa gundhig u ah helitaanka isbeddel bulsho oo taabba gala dhowr arrimood oo is-huwan:

- Wax ka beddelka hab-dhaqanka iyo fakarka bulshada (Cultural and Idealogical Shift): in bulshada dhexdeeda iyo dhallinta soo koraysa loo abuuro lana baro qiyam (values) iyo waxyaallo lama-gudbaan ah oo saldhig u noqda noloshooda iyo hab-dhaqankooda, sida: wadaninimada, fahamka dawladnimada, daris-wanaagga, ilaalinta bii'ada, gacan qabashada dadka taagta daran, ka fogaanshaha qabyaaladda, fahamka dowrka qofkasta ku dhexleeyahay bulshada iwm. Isbeddelkaan waxaa laga hirgelin karaa baraha bulshada iyo meediyaha kala duwan, goobaha waxbarashada iyo manaahijtooda iyo dhaqdhaqaaq wacyi-gelineed oo laga dhex fuliyo bulshada dhexdeeda.
- Abuurida dhaqdhaqaaq bulsho iyo ururo isbeddel doon ah (Social Movement and Activism): in lagu dhaqaaqo abaabul isku dubaridan iyo in la abuuro ururro bulshadeed si gaar ah ugu howlan sidii looga shaqayn lahaa in isbeddel lagu sameeyo bulshada waxay ka aaminsan tahay nolosha, siyaasadda, dawlad-dhiska iyo wada-noolaanshaha bulshada dhexdeeda. Way jiraan ururro badan oo ku magaacaaban bulshada rayidka ah, waxayse u eg tahay in ay fuliyaan mashaariic loogu adeego danaha hay'adaha aan dawliga ahayn ee caalamiga ah iyo kuwa gudahaba. Waxaa bulshadu u baahantahay ururro u eg sida Xarakaadka Islaamiga ah ee iyagu dhaliyay isbeddel la taaban karo dhanka caqiidada iyo labiska dumarka kuna guulaystay muddo kooban in ay ku keenaan isbeddel aragtiyeed; inkasta oo ay ku fashilmeen wax ka beddelka aragtida iyo fahamka dawladnimo ee bulshada dhexdeeda.
- Dhisidda hay'ado iyo nidaam (Institution Building) lagu wada kalsoonyahay ka hor awood qaybsi iyo khayraad wadaag. Arrinkaan wuxuu abuurayaa in faham sax ah laga haysto noocyada heshiis

iyo nidaam ee dadku aaminsanyahay ama ku kalsoonyahay inta aan loo gudbin wax-qaybsi iyo wax-wadaag. Haddii aysan jirin hay'ado la wada ixtiraamayo oo kala haga dadka, nidaamiya nolosha, loo arko in ay cadaalad yihiin, in laga bilaabo waxqaybsiga siyaasadeed ama khayraad waxay dhalinaysaa sad bursi, kala aamin bax iyo qanaaco xumo. Nidaamka dawladnimada waa ku cusub yahay Soomaaliya, moodelka uu gumaysigu uga tagayna waa mid ku dhisan in inta talada haysataa iyagu wax boobaan ama ehelkooda naas-nuujiyaan. Bulshada Soomaalida waxay u baahantahay moodel kaas ka duwan, oo abuuraya kalsooni iyo caddaalad bulsho loo simanyahay.

## MAXAAN LAGA BARAN KARAA TAARIIKHDA DHOW?

Marka la eego taariikhda dhow ee bulshada caalamka, waxaa jira labo qaab oo waaweyn oo bulshooyinku uga gudbeen qalalaasaha iyo is-maandhaafka bulshada:

1. **Wadahadal iyo heshiis bulsho (Negotiated Settlement):** Koonfur Afrika iyo Rwanda waxay muujiyeen in colaadaha qotada dheer lagu xallin karo wada-xaajood. Waxay dhiseen hay'ado cusub oo sharciyeynaya nidaamka cusub. Weli Soomaaliya kama hirgelin wada-hadal iyo kala eed-sheegad dhab ah ee bulshada iyo qabaa'ilka dhexdooda. Dagaallada sokeeye iyo colaaduhu waxay u joogsadeen si aan qorshaysnayn ama ku imaan dib u heshiis dhab ah oo lagu qanacsanyahay natiijadiisa. Waxaa suurtagal ah in markasta ay colaadahaas dib usoo cusboonaadaan haddii aan heshiis bulsho cadaalad ah oo lagu wada qanacsanyahay laga gaarin.

2. **Dib-u-dhis hay'adeed (Institutional Reconstruction):** Jarmalka iyo Japan kadib WWII waxay xoogga saareen dhisidda hay'ado adag oo xaddida awoodda siyaasadeed. Soomaaliya weli kama jiraan hay'ado adag oo danta bulshada iyo tan guud ka hormarinaya danta deegaanka iyo tan qabiilka. Weli waxaa awood qaybsigu ku dhisanyahay danaha qabiilka iyadoo qabiilooyin badani ku ciil qabaan ama u arkaan in la dulmiyey. Waxaa lagama maarmaan ah in la dhiso hay'ado ka madax banaan dano qabiil, kuna dhisan dan qaran, horumar bulsho iyo mid qofeed. Hay'ado ku dhisan qofku muxuu yaqaan, muxuu qaban karaa ee aan ku dhisnayn reerkee iyo deegaankee ka soo jeedaa.

Waxaan shaki ku jirin in Soomaaliya ku soo noqon karto oo keliya in si siman oo taxaddar leh loo hirgeliyo labadaas qaab ee kore.

## MAXAA HORTAAGAN XALKA SOOMAALIYA?

Haddii si kooban loo falanqeeyo, caqabadaha ugu waawayn ee ilaa hadda hortaagan dib usoo kabashada Soomaalaya waa mid isku dhaf ah oo isugu jira mid dawladeed iyo mid dhaqan:

- Caqabado Amni (Security dilemma): Weli waxaa muuqata in aan si buuxda qabaa'ilka iyo deegaannadu isugu qabin kalsooni amni oo buuxda. Reerkasta iyo deegaan kasta wuxuu haystaa hubkiisa, maleeshiyaadkiisa, waxaana suurta gal ah in markasta dagaal qabiil ka dhex dhaco. Weli laguma guulaysan in la sameeyo hub ururin bulshada iyo qabaa'ilka ah iyadoo aan weli bulshadu kalsooni buuxda ku qabin maamullada iyo nidaamka dawladnimada, kana haysan faham buuxa.

- Faragelinta dibadda (Foreign Interference): Caqabadaha waawayn ee weli loo gaari kari la' yahay hannaan dawladnimo iyo heshiis bulsho oo dhab ah waxaa qayb ka ah dawladaha dariska ah iyo kuwa Bariga Dhexe oo u muuqda in ay faragelin joogta ah ku hayaan dawlad-dhiska Soomaaliya iyagoo ilaashanaya danahooda qaran iyo xisaabaadkooda juqraafi-siyaasdeed. Qofkasta oo raba in uu hoggamiyo Dawladda Dhexe ama Dawladaha Goballada wuxuu dhabarka ku hayaa taageero shisheeye iyo dhaqaale ay bixiyaan. Ilaa laga maarmo faragelintaas shisheeye, waa adkaanaysaa in dawladnimo sax ah ka hirgasho Soomaaliya.

- Dhaqanka qabiilka (Toxic Somali Culture): inkasta oo dhaqanka qabiilka Soomaalida yahay nidaam bulsho oo taariikhi ah, haddana wuxuu caqabad aan la inkiri karin ku yahay dhismaha hay'ado qaran oo dhexdhexaad ah. Awood-qaybsiga jagooyinka dawladnimadu waxay ku dhisantahay awoodda qabiilka kaslooni daro laga qabo sida caddaalad loo siman yahay loo heli lahaa.

- Xaalad Kala Guur oo Dastuuri ah (Constitutional Crisis): Waxaan weli loo hayn ixtiraam iyo qaddarin heshiisyada dawladnimo ee bulshada sida Dastuurka oo kale oo u muuqda in uu yahay khad waraaqo ku qoran, wax ixtiraamna aan lahayn. Waxaa hadda dhamaaday muddo xileedkii Barlamaanka Federaalka iyada oo xitaa la iswaydiin sidii looga gudbi lahaa. Waxaa dhamaad ah muddo xileedkii xukuumada (Ra'iisulwasaaraha iyo Maxadwaynaha) iyadoo aan la is waydiin sidii dawlad cusub loo soo dooran lahaa. Waxaa burburay ixtiraamkii loo yahay nidaamka Federaalka ah marka la eego duullaanka hubaysan ee magacaabista ay DFS ku samaysan Baydhabo. Haddii aan arimahaan deg deg loo xallin, waddanku wuxuu gelayaa xaalad hubanti la'aan iyo kala guur ay adag tahay in dhakhso looga soo kabto.

## DIB-U-DHISKA HESHIISKA BULSH CUSUB

Marka aad looga fakaro, xaaladda hubanti la'aan ee siyaasadeed iyo isbedelka bulsho ee ku habboon xilligaan kala guurka ah, waxaa cad in loo baahanyahay dib u dhis heshiis bulsho oo cusub. Dib u dhiska heshiiska bulshada wuxuu u baahanyahay saddex tiir:

- Sharciyeyn (Legitimacy): Bulshadu waa inay dareentaa in nidaamka matalaa, caddaalad iyo sinaan u horseedi karo.

- Wax-ku-oolnimo (Effectiveness): Hay'adaha dawladda waa inay bixiyaan adeegyo loogu adeegayo bulshada oo ku dhisan caddaalad iyo in bulshadu u simantahay, kala soocidna ka maran.

- Isla-xisaabtan (Accountability): In la abuuro nidaam daahfuran oo lagula xisaabtami karo hoggaamiyaasha iyo hay'ahadaha Dawladda.

In la helo heshiis bulsho oo cusub oo ku dhisan saddexdaas tiir waxay u baahantahay geeddi-socod dheer oo isku dhafan dhan siyaasadeed, dhinac dhaqaale iyo khayraad bulsho iyo weliba kacdoon iyo dhaqdhaqaaq isbedel doon ah oo ay hoggaaminayaan dhallinyarada waxbaratay, kana maran waxyaalihii horay u soo ragaadiyay bulshada Soomaaliyeed, sida: qabiil iyo nin jeclaysi ama in danta gaarka ah laga hor mariyo danta guud iyo tan qaran.

Si uu u taabo galo heshiiska bulsho ee dhabta ah, waa in lagu saleeyaa aragtida casriga ah ee dowladnimada taas oo diiradda saaraysa waxaa loo yaqaan "shared sovereignty." Aragtidani waxay ka dhigantahay in awoodda aan lagu koobin hal xarun, deegaan iyo qayb ka mid ah bulshada balse lagu qaybsado heerar kala duwan oo isku xiran, kuna dhisan sida loo gaari karo horumar iyo dib u dhis lagu wada kalsoonyahay. Tusaale ahaan, dalalka sida Canada iyo Switzerland waxay muujiyeen in nidaam federaal ah oo si sax ah loo maareeyo uu noqon karo mid xasilloon oo waara.

Taabbagalka heshiis bulsho (Social Contract) oo cusub, laguna heli karo nidaam dawladeed oo waara wuxuu u baahan yahay:

- Qeexid cad oo awoodaha DFS iyo DXF.

- Nidaam wadaag dhaqaale iyo khayraad la isla ogol yahay.

- Hay'ado dhexdhexaad ah oo si siman ugu adeega bulshada iyo deegaannada Soomaaliyeed.

## GUNAANAD:

Soomaaliya waxay maraysaa marxalad kala guur oo adag una baahan in dhakhso looga gudbo. Go'aan qaadashada hortaalla waa mid cad: In la dhiso nidaam iyo heshii bulsho cusub ku dhisan qiyam, akhlaaq, isfahan, wadanoolaansho iyo dawladnimo u adeegta danta guud oo ka fog awood qaybsi beeleed, deegaan ama qof jeclaysi iyo sad bursi. Waxaan u baahannahay adeegsiga iyo dhaqangelinta aragtiyo-cilmiyeedka cilmiga bulshada si aan u daraasadayno hab fakarka bulshada uguna horseedno isbedel taabanaya dhinacyo badan. Taariikhdu waxay muujinaysaa

in dowladnimo waarta aysan ka dhalan guul hal dhinac ah, balse ay ka dhalato tanaasul iyo dhisidda kalsoonida bulshada. Si loo dhiso mustaqbal fiican iyo heshiis bulsho oo cusub waxaan soo jeedinaynaa talooyinka soo socda:

1. **Maxkamad Dastuuri ah:** Waa in la dhisaa hay'ad leh awood sharciyeed iyo madax-bannaani buuxda. Soomaaliya ka biximayso ismari waaga soo noqnoqda iyo hubanti la'aanta haddii aysan jirin hay'ad dastuuri ah oo lagu wada kalsoonyahay, kalana saarta hoggaamiyaasha heerarka kala duwan.

2. H**eshiis Qaran oo Cusub:** In la qabto shirar dib u heshiineed oo baahsan, la isuguna qalbi xaarayo bulshada Soomaaliyeed sida kuwa laga hirgeliyay Rwanda oo kale; si looga saaro meesha kala aamin baxa bulshada iyo qabaa'ilka Soomaaliyeed.

3. **Dib-u-habeyn Amni:** In la mideeyo ciidamada, lana dhiso nidaam adag oo lagu sugayo amniga deegamada iyo kan bulshada. Midaynta ciidan qaran oo ka howlgala xuduudaha keliya iyo nidaam booliis iyo Daraawiish ka hawlgala gudaha deegaannada iyo maamullada oo aan midba kan kale ku xad gudbin waxay lama huraan u tahay dib u soo kabashada qaran.

4. **Nidaam Maaliyadeed oo Hufan:** In la sameeyo xeerar iyo xeer-nidaamiyaal cad oo lagu qaybsado dakhliga iyo khayraadka dalka si loo simanyahay oo caddaalad ah.

5. **Xoojinta Waxbarashada iyo Wacyiga:** In bulshada la baro muhiimadda dowladnimada iyo sharciyadda. In sidoo kale la dhiirigeliyo qiyamka suubban iyo wada noolaanshaha iyada oo lagu darayo manaahijta waxbarashada iyo barnaamijta wacyi-dhiska bulshada.

6. **Joojinta Ku-tiirsanaanta Dibadda:** Shaki kuma jiro in Soomaaliya aysan weli si buuxda isugu fillayn. Waxaase laga maarmaan ah in la joojiyo ku tiirsanaanta dibadda ee arrimaha siyaasadda iyo faragelinteeda. Waa in laga hortagaa in qof jago rabaa uu dhaqaale iyo taageero nooc kasta ah ka helo dibadda. Waa in doorashooyinka iyo qabashada xukunku ku dhismaan barnaamijta, aragtida iyo fikradaha horumarineed ee qofka ama kooxda damacu kaga jiro hoggaanka bulshada iyo qaranka ee aysan ku dhisnaan laaluush, gacan shisheeye iyo cod iibsi.



# DHITADU WAA DHALLINYARADA:
## FAYA-DHOWRKA FACA SOO AADDAN



Cabdiweli Axmed
Muumin



Xigashada Sawirka:

Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa Ilaahay ninkuu xoolo la maago dadkeeduu siiyaa! Dhaqankeennu, haddaynu Soomaali nahay, waxa uu ku salaysanyahay, guud ahaan, nolol-dhaqameedka miyiga: hiddaheenna rasmiga ahi iyo ilaha dhaqameed ee aan ka cabnaayi waa miyiga. Sidaas darteed waa lagama-maarmaan in aynu isla fariisinno dulucda maahmaahdan, innaga oo si weyn isha ugu hayna dhaqanka ay dhabarka ku hayso (the cultural background) amaba 'khalfiyadeeda', sida erayada qalaadi u sheegaan si aynu u garwaaqsanno sidkeeda. Si kooban, macneheedu waa in uusan ninna xoolo, mood iyo maalba, dhaqan karin haddii uusan u haysan ciidan, ama dad u quma dhawrista iyo ilaalinta xoolahaasi, si gaar ahaan goorta u gabowgu haleelo.

Sidoo kale maahmaahdu waxa ay tibaaxaysaa in 'dadkeeda' la sheegayaayi uu yahay dhallinyaro amaba barbaar madaasho ah oo weliba ay lexejeclo ku larantahay falsamidooda, sida aynu ka dhadhamin karno maahmaahda qaybteeda dambe ee ah 'dadkeeda'! Haddaynu welibana sii uurdooxno nuxurka, waa waayeel aan dhallinyaro dhaxlayni waxaa ka horreeyaa waa gablan iyo guri madow!

Warka dulucdiisu waa ninkii aan da'yar lahayni waayaha soo aaddan qayb kuma laha, dhaxalkiisuna nin kale buu u yaallaa. Waa haddaynu xaal adduun iyo meertada waayaha wax ku fiirinno. Soomaalidii hore ma aysan moogayn arrinatan, kamana aysan maqnayn maankooda. Si weyn bay ugu baraarugsanaayeen; in nikii aan 'rag' ka dambayni uu hallaysan yahay! Wax yar haddaynu milicsanno suugaanta Soomaaliyeed waxaa durba soo ifbaxaysa sida ay u ogaayeen muhimadda dhallinyarada iyo faca soo aaddan, iyo weliba waxtarka ay u leeyihiin beeshooda.

Aynu bal tusaale u soo qaadanno Maxamed Fiin. Waa mid ka mid ah hal-abuurradii waaweynaa ee qaybta ka ahaa silsilad-suugaaneeddii caanka noqotay ee Guba la magac baxday ee guntantay 1930-meeyadii ilaa1950-meeyadii, qiyaastii. Isaga oo marna ku diganaya, marna dhaliil u jeedinaya gabayaa kale, waa Cali Jaamax Gorayo oo loo garan ogyahay Cali Dhuux, buu gabay mariyey. Waxaa ka mid ahaa mirihii gabaygaasi sadaradan:

*Guntigii wadaadkii la eed gebagabayntiiye*

*Galow baa ka ciyey ceelashaad geesi ku ahayde*

*Buuhoodle geel looma horin goorti dabadeede*

*Gammaankii badnaa ugama fulo labada geesoode*

*Garla'dii shubaysiyo la waa garabyo weyntiiye*

*Geedaha ka baxay laga ma cuno godobyadaw dhowe*

*God abaaday waakaa noqdiyo guri madoobaade*

*Waxa guuldarrada ugu wacnaa geli colaadeede*

*Waa gaasir Reer-Cali wuxuu wada gudboonaaye*

Waxa uu gabyayaagu uu Cali Dhuux u sheegayaa in reerkiisu ay ku daba lumeen "Wadaadkii", Waa Maxamed Cabdille Xasane, ama "Sayidka", oo ay "Garla'dii" oo ah ubixii soo kacayey ee reerka, ku le'atay duullamadii wadaadka, waa sida uu Maxamed Fiin u bixinayo sawir suugaameed aad u qurux badane, kiiskiisa Cali ka dhanka ahna uu ku xoojinayo. Maxmed Fiin wuxuu leeyahay oo kale "Reer Cali", waa jifadij Cali-Dhuux, waa "gaasir" oo mustaqbalkeedu waa madowyahay, saa ubaxoodii iyo dhallinyaradii qoysku waa ay le'ataye!

Waxaa la mida Maxamed Cabdille Xasan isaga oo ku diganaya sargaal sirdoonkii Daraawiishta ee Cadan ka hawl geli jirey ka mid ahaa, oo ka goostay isuna dhiibey maamulkii Ingiriiska ee Cadan fadhiyey. Sayidkuna waxa uu kaga falceliyey in uu laayey wiilashiisii xarunta Daraawiishata joogey oo, sida la sheegay, maagay in ay iyana ka baxsadaan xarunta oo la midoobaan aabbahood, ka dib markii uu u soo cid-diray. Dabadeedna waa la makalay wiilashii, midina kama fiigin. Waxa uu yiri Sayidku: "Arki maysid ina shixiriyow inamadaaye!"

Waxaa iyaguna badnaa hal-abuurradii sheegay in haddii dhallinyaradu aysan u diyaarsanayn mustaqbalka aan aayo la sugaa jirin, oo qoyskaasi ama ummaddaasi ay hagaastay ama hoogtayba! Aad bay u badanyihiin hal-abuurrada suugaanta ku cabbiray ciilka ay leedahay haddii dhallinyaro hanaqaad noqon weydo oo lagu hungoobo korriimohoodii.

Marka korriimada guud iyo hanaqaadka barbaarta laga yimaado, waxa aysan waayeelkii Soomaaliyeed hore iyana ka ilduufin doorsoonka dadnimo iyo kan diimeed ee da'yarta uga muuqda amaba ay ku saluugaan. Meel dheer bay ka arki jireen koodii 'la weheliyo' ee ay bayri ka muuqato hab-dhaqankiisa. Waayeelka ayaa marka uu ka warbixinayo barbaarkaas bayrta yeeshay oran jirey, hooyo hebel "dadkeenna ma aha!". Macnuhu ma aha reerka uma eka iyo kama dhalan, ee waa wax kale baa madixiisa galay; waa beddelanyahay; cid kaluu u joogaa! Afka manta lagu hadlo haddaynu ku sheegno, macnuhu waa isku caqiido iyo diin ma nihin.

Taariikhda Soomaalida haddii dib loo raaco, tan iyo intii uu gaalku (gumeystihii) reerka (Soomaaliya) yimid, 1900-ladii laga soo bilaabo, waxaa dhacay doorsoon dhaqan iyo mid diimeed oo xooggan. Gaalku waxa uu saamaynta ugu weyn ku lahaa

dhallinyarada intii uu laylyaday ee u dhago nugulayd, hawl-wadeenno na u ahayd, isaga oo farsamooyin kala duwan u soo maray gacan-ku-dhigistooda. Isaga oo arrintaasi ka gubanaya aad na uga dabaaqtamaya buu hogaamiyihii kacdoonkii Daraawiishtu, Sayidku, ka digey arrintaas, waxa uuna ka tiriyey suugaan badan oo kala duwan, siyaabo badanna waa uu uga hadlay. Waakii uu mar lahaa:

*"Waakaa fircoon dareersaday diricyadiinniiye*

*Waa kaa diyaar ugu akhriyey diinta gaalada e"*

*Mar kale waatii uu lahaa, isaga oo dhallinyarada iyo maxasta, guud ahaan, la hadlaya, waayeelka gabay na u duur xulaya:*

*Doodan waxaan u leeyahay, dumarkiyo carruurtoo*

*Dadkii idinka waynaa, hadday idin dulleeyeen*

*Dambi kama ay yaabine, cuntay idinka doorteen*

*Duunyaa la dhaafsaday, dugsigaad galeeyseen*

*Dameerkuna ma yeeleen, halkay talo ku daysteen*

*Dab intay shideen bay, dalaq idinku siiyeen*

*Doox intay qodeen bay, ciid idinku daadsheen*

*Nin idiin damqanayaa, idinkama dambeeyee*

*Hadaydaan digtoonaan, daad bay idin qaadiye*

*Duleedada kufaartaa, dacas idinku laynoo*

*Naf dalkaaga doonaysaa, firaash looma daadshee*

*Dabkan aan shidaayaa, daawadiinna weeyee*

*Dariiqii rasuulkiyo, dawga ha ka baydhina!*

Wax la soo halgamaba 60-meeyadii iyo gobonnimadii baa la soo gaaray. Guud ahaan bulshadu waa ay bishaaraysanaysey. 'Baloy bayr' baa la lahaa. Hase yeeshee indheergaradkii, oo guud ahaan aan badnayn sideebdaba, baa qaarkiis wax u muuqdeen. Waxa ay arkeen xubnihii uu gaalku laylyey oo ay ka muuqdaan nabarro aa dhayid lagu dayeyn. Waxaa u muuqday in ay silloonyihiin oo aysan la bah ahayn dadka ay xafiisyada u fadhiyaan, marka la fiirsho xagga dhaqankooda iyo yeelkooda guud. Waxa uu abwaanku gartay in dadkan gaalku xerada uga tagayi aysan sinaba u suubbanayn. Indheergaradkaas waxaa ka mid uun ahaa Allaha u naxariistee faylasuufkii weynaa, gabayaagana ahaa, Guhaad Cabdi-Gahayr. Isaga oo bulshada u sheegaya in gaalnimadu aysan ahayn saanta cad ee ay tahay diin iyo aragti nololeed oo xun, una sheegana in gaalkii saan-caddaha ahaa ee dhulka laga eryey iyo Soomaalidii uu xafiisyada u laylyey, ugana tageyi ay ku kala duwan yihiin haragga jirkooda uun, ee sida kale ay labo gaal uun yihiin, buu Guahaad yiri:

*"....................................................*

*Good iyo Abees ba is badalay garanameysaan*

*Goroyadi ilmihi bey ka tagtay guumiska aha*

*Gocondhoyin ba assan iyo mici gabareeye*

*Karal kaama guurine halkaanu guud madow yahay!*

*......................................................"*

Waxa uu gabayaagu bulshada u sheegay in laba nin ee xilka la kala wareegtayi ay xagga waxyeellada ay ummadda u leeyihiini tahay uun sida good iyo abees oo kale. Waa laba halaqa oo lagama-gaaraan ah labaduba hadday ku qallacaan. Sida oo kale waxa uu beydka ugu dambeeya ku sheegayaa in "Karal" oo ahaa badhasaabkii gobollada waqooyi ee xilligaasi, uusan guurin oo aan laga xoroobin dhaqankiisii iyo diintiisii aan diidaneyn, ee uu weli joogo isa oo saantiisii caddayd ee muuqanaysey uun ku bedeshey "guud madow...".

Sida oo kale gabayaagii weynaa Axmed Ismaaciil Qaasin waatii uu laha:

*Isma doorin midkii aan diriyo, daarta kii galaye*

*Dusha midabka Soomaali baad dugulka mooddaaye*

*Misna laguma diirse waa dirkii Frenji!*

Arrimahaan oo dhami wax aay inoo muujinayaan in dadka Soomaaliyeed, sida dadyowga kalaba, ay u dhug lahaayeen dhawrista iyo korriimaha da'yarooda, iyo mudnaanta ay da'yartu u leedahay mustaqbalka ummadeed ee soo aaddan, iyo weliba kan taagan ee lagu looltamayo.

# QAADKA IYO SAAMAYNTIISA BULSHADA:

## DHIBAATADA TAAGAN IYO BAAHIDA WACYIGELINEED



Dr. Cabdinaasir Jaamac Warsame Islaam



Xigashada Sawirka: VOA

# HORDHAC

Qaadka waxa uu ka mid yahay arrimaha ugu saamaynta badan ee muddo dheer ka taagnaa bulshada Soomaaliyeed, isaga oo si toos ah iyo si dadbanba u taabtay nolosha bulshada, dhaqaalaha qoysaska, caafimaadka shakhsiga iyo horumarka guud ee dalka. Inkastoo dadka qaarkiis u arkaan dhaqan ama madadaalo maalinle ah, haddana xaqiiqadu waxay muujinaysaa in qaadku sababay dhibaatooyin isugu jira kuwo caafimaad, bulsho, dhaqaale iyo maskaxeed oo si weyn u saameeyey qofka iyo deegaanka uu ku nool yahay.

Maqaalkani waxa uu iftiiminayaa saamaynta qaadku ku leeyahay bulshada, isaga oo si gaar ah u eegaya waxyeellada uu u geysto caafimaadka jidhka iyo maskaxda, culayska dhaqaale ee uu ku hayo qoysaska, iyo sida uu u wiiqo wax-soo-saarka iyo horumarka bulshada. Sidoo kale, maqaalka waxa uu taabanayaa aragtida diinta Islaamka iyo doorka caqliga saliimka ahi ku leeyahay qiimaynta waxa waxtar iyo waxa waxyeello leh.

Ujeeddada qormadani ma aha oo keliya in la xuso dhibaatada qaadka, balse waa in la abuuro dood cilmi iyo wacyigelin ku dhisan oo bulshada ku baraarujinaysa baahida loo qabo dib-u-eegis dhab ah oo ku saabsan isticmaalka qaadka iyo saamayntiisa mustaqbalka jiilasha soo koraya.

# WAA MAXAY QAADKU?

Dad badan oo ku xeel dheer aqoonta qaadka ayaa sidan soo socota ku qeexay:

- Qaadku waa geed maanka doorsha (mukhaddir) oo caleemihiisa la calaashado, oo aan miro iyo ubaxba bixin (Dawiilaha, 1986).
- Qaadku waa geed la beero oo kol kol aad u weynaada oo caleemihiisa laga ganacsado oo la calaashado; wuxuu ka mid yahay dhirta maanka doorisa, sida Xashiishka iyo Afyuunka (Yaasiin C. Keenadiid, 1976).
- Qaadku waa geed maanka doorsha (Mukhaddir) aadna sun u ah, khamradana ka wax yeelo badan (Dr. Faraj Zahraan, 1983).
- Qaadku waa geed mukhaddir ah caafimaadkana u daran; sababtuna waa maaddada loo yaqaan "Cathine" ama kaathiin (Cizat Xuseen, 1986).
- Qaadku waa geed ka baxa Bariga Afrika (Soomaaliya, Itoobiya, Kiinya iyo Muuzambiiq), dhacana xagga waxyeellada Kookeynta iyo Afyuunka dhexdooda (Al-Gayaamah, 1411H).
- Qaadku waa mukhaddar cunistiisu ku faaftay dalka oo dhan, waana maandooriye dadka caqligii ka qaaday dhibna u geystay haddii la eego xag dhaqaale, akhlaaqeed, bulsheed iyo tacliimeed (Cali Sh. Cabdullaahi Yalaxow, 1988).
- Qoraallada laga qoro qaadka waxay tilmaamayaan inuu yahay mukhaddir qofku qaayibi karo (ama daa'imi karo), (Peters, 1952).
- Qaadku wuxuu keenaa "Araq" ama hurdo la'aan, wuxuu dhib u geystaa dareemayaasha, maskaxda iyo laf dhabarta (Spinal Cord). Waxa qaadka ku jirta maadooyin badan sida Tannins oo si gaar ah wax u yeesha Dheefshiidaha (Axmad Fakhri, 1975).
- Qaadku waa mukhaddir fudud oo laga helo geed noocyo kala duwan leh; dhererkiisuna mar mar gaaro lix mitir (L. Zimonisz).
- Aqoonyahannada badanaaba waxay aragtidoodu ku aruursan tahay in qaadku yahay maaddo caqliga doorisa oo waliba khatar aad u daran leh (Al-Maqrami, 1987).
- Qaadku waa "shaydaan geed loo ekaysiiyay!" (M. Maxamuud Az-zubayri, 1958).
- Qaadku waa geed qofka cuna ka dhiga ku firfircoon, oo nashaad geliya (Ibnu Batuuta), [Fu'aad Al-Qasus, 1972].

# WAA MAXAY MUKHADDIR (DRUGS)?

- Qeexidda 1-aad: Waa maadda kasta oo wax dabiici ah (sida Qaadka, Xashiishka, Afyuunka iyo Kookaha) ama la sameeyo oo soo saarta canaasir (elements) neerfayaasha kiciya ama dajiya, oo haddaan loo isticmaalin caafimaad ahaan iyo warshadeyn keeni karta caadaysi iyo idmaan, oo halis galisa qofka iyo bulshada, gaar ahaan xagga caafimaadka iyo nafta. (Dr. Faraj Zahraan, 1983).
- Qeexidda 2aad: Waa maaddo kasta oo haddii la qaato (cuno ama la cabbo) u keenta jirka dhib iyo shiddo, caqliga iyo miyirka tebisa, oo keenta "Qaayibid" ama Idmaan (Joogtaysi). Qawaaniintuna ay xaaraantimaysay.

## ASTAAMAHA LAGU GARTO RUUXA QAAYIBA (IDMAAN):

1. Ka fogaanshaha uu ka fogaado dadka (Isolation).
2. Rafaad, bas iyo is daryeelid la'aan (gaar ahaan nadaafada).
3. Wahsi iyo hamaansi joogta ah.
4. Waji kaduud, dhidid, faro gariir.
5. Cunto yari, weydnimo iyo calool istaag.
6. Xanaaq degdeg ah.
7. 7. Aqoon raadin la'aan iyo shaqo goyn goyn.
8. T.V. horfariisi.
9. Been, dhagar iyo khiyaamo hanti lagu raadsho.
10. Xadidda ashyaada qaaliga ah si uu u helo lacag uu ku gato qaadka.

## NOOCYADA QAADKA

- Cilmi ahaan: Catha edulis & Catha spinosa.
- Magacyada loo yaqaan: Harari, Miirow, Giza-bomb (nooc gaagaaban), Baga (caleemo waaweyn), Gangeti (dhaadheer), As-siici, An-nahmi, Marcaa (af-sawaaxili), iyo kuwo kale.

o **Fiiro gaar ah:** Giza-bomb waa nooca marka la cuno aad loogu wareero.

## DALALKA QAADKU KA BAXO

Qaadku wuxuu ka baxaa dalalka:

- Itoobiya: Harar, Diridhaba, Kafaa iyo Shawaa.
- Keenya: Buurahaan, Gawn, Keenya iyo Khuyuulo.
- Yaman & Sucuudi Carabiya: (Buuraha Al-suraah, Viiva, Banii Maalik).
- Soomaaliya: Wax yar ayaa ka baxa, gaar ahaan waqooyi galbeed.
- Dalal kale: Muuzambiiq, Ruushka, Afgaanistaan, Tanzaaniya, Malaawi, Marooko, Tuunis, Al-jeeriya, New Zealand, Afrikada Koonfureed, iyo Ugaandha.

## DALALKA QAADKA LAGA CUNO

- Soomaaliya. Yaman.Itoobiya, Keenya (Dhanka Waqooyiga),.Sacuudiga. Madagaskar (ilaa tan iyo 1940-kii).

## DALALKA QAADKU UU KU FAAFAY

Faafida Qaadka waxa mas'uul ka ah dadyawga u dhashay dalalka Qaadka laga cuno, sida Soomaalida, Carabta, Itoobiyaanka iyo Keenyaanka. Waxayna gaartay heer dad badani ka dhigtaan meherad (Aboolayaal).

## ERAYGA QAADKA IYO AFAFKA KALA DUWAN

Erayga Qaad waxaa loo hingaadiyaa siyaabo kala duwan:

Qaad, Khat, Jaad, Chat, Ghat, Kaat, Kad, Qu'at, Quut As-Saalixiin, Mirra (Miirow), Abyssinian Tea, African Tea, African Salad, Arabian Tea, Chata, Toai, Tschat, Kat, "Khamrul Saalixiin" (Yaman), iyo Khamrada Cagaaran (Soomaaliya).

**MUTAYSI:**

# MIID AYSAN SOOMAALIDU MUUDSAN



**Bashiir Suuley**



Xigashada Sawirka: AI Gen

Mutaysi (meritocracy) waa mabda' ku saleysan in xilalka iyo shaqooyinka lagu bixiyo karti, aqoon iyo waxqabad, halkii laga eegi lahaa xiriir, qabiil ama dano gaar ah. Marka laga hadlayo dawladnimada casriga ah, su'aasha muhiimka ahi waxay tahay: sidee ayuu mutaysigu u saameeyaa awoodda dowlad, hufnaanteeda iyo kalsoonida ay bulshadu ku qabto?

Cilmi-baarisyo caalami ah oo ay sameeyeen aqoonyahanno iyo hay'ado waaweyn ayaa si qoto dheer uga jawaabaya su'aashan, iyagoo muujinaya in mutaysigu yahay tiir lama huraan u ah dowladnimo dhab ah.

## MUTAYSIGA IYO DHISMAHA HAY'ADAHA DOWLIGA AH

Aqoonyahanka reer Jarmal Max Weber oo lagu tiriyo aabbaha cilmiga maamulka casriga ah, ayaa sharraxay in nidaamka ugu wax ku oolsan ee dowlad lagu dhiso uu yahay mid ku saleysan shaqaale xirfad leh oo lagu soo xulay kartidooda. Buuggiisa "Economy and Society" wuxuu ku caddeeyay in nidaam ku dhisan xirfad iyo kala dambeyn uu ka awood badan yahay dhammaan nidaamyada kale ee la adeegsado.

Aragtidan waxay muujinaysaa in dowlad kasta oo rabta inay noqoto mid si dhab ah u shaqaysa ay u baahantahay hay'ado ku dhisan aqoon iyo xirfad, halkii ay ka ahaan lahaayeen kuwo ku dhisan danaysi.

## MUTAYSIGA IYO AWOODDA DOWLADNIMADA CASRIGA AH

Cilmibaaraha caanka ah ee Reer Maraykan Francis Fukuyama ayaa buuggiisa "Political Order and Political Decay" ku xusay in dowlad casri ah aysan jiri karin haddii aysan lahayn shaqaale dowladeed oo lagu xushay karti, xirfad iyo aqoon. Fukuyama waxa uu si cad u sheegay in dowlad xooggan ay u baahantahay hay'ado madax-bannaan oo shaqaaleheeda lagu xusho mutaysi, ee aan lagu dhisin danaysi.

## MUTAYSIGA IYO YARAYNTA MUSUQMAASUQA

Warbixin uu soo saaray World Bank oo cinwaankeedu yahay "World Development Report 2017: Governance and the Law" ayaa muujisay in: Nidaamyada shaqaalaysiinta ee ku dhisan mutaysiga ay kordhiyaan waxqabadka dowladda isla markaana yareeyaan musuqmaasuqa.

Sidaas si la mid ah daraasad ciwaankeedu yahay (Bureaucratic Structure and Economic Performance in Less Developed Countries) oo ay qoreen cilmibaarayaasha Reer Maraykan ee Evans iyo Rauch ayaa caddeysay in: dowladaha leh nidaam shaqaale oo ku dhisan mutaysi ay gaaraan koboc dhaqaale oo ka sarreeya kuwa kale.

Aqoonyahannada Daron Acemoglu iyo James A. Robinson buuggooda "Why Nations Fail" oo ka mid ah buugaagta loogu iibsiga badanyahay waxa ay ku doodeen in horumarka dalalka uu ku xirnaanayo hay'adaha ay leeyihiin. Waxa ayna tilmaameen in: hay'adaha dowladeed ee caddaalad iyo sinnaan ku dhisan shaqaalahoodana mutaysi lagu soo xulay ay yihiin kuwa horseeda horumar waara. Taas oo sabab u noqon karta yaraynta iyo maaraynta musuqmaasuq baaha.

## SOOMAALIYA IYO XAALKEEDA XULASHADA MASUULIYIINTA DOWLADDA

Marka aan hoos eegno soona jalleecno Soomaaliya iyo xaalkeeda waxaa si cad u soo baxaysa in gabi ahaanba ay ka gedisantahay xaaladaha aan kor ku soo xusnay. Waa ay adagtahay in masuul dowladeed lagu qaddariyo ama lagu xusho kartidiisa iyo aqoonta uu u leeyahay shaqada loo dhiibayo. Warbixin uu daabacay World Bank oo cinwaankeedu yahay "Somalia Public Sector Capacity Injection Project" (2017) ayaa xustay in nidaamka shaqaalaysiinta dowladda Soomaaliya uu si weyn ugu tiirsanyahay danaysi oo aan marna la eegin mutaysi. Sidoo kale, daraasad ay sameysay UNDP cinwaankeeduna yahay "Institutional Capacity Assessment in Somalia" ayaa iyaduna xustay in shaqooyinka dowladda inta badan loo adeegsado abaal-marin siyaasadeed, halkii laga

eegi lahaa kartida iyo aqoonta shaqsiga shaqada loo dhiibayo. Cilmibaaris kale oo aan kuwa sare ka fogayn ciwaanna looga dhigay “State-building in Somalia: Beyond Patronage Politics” uuna daabacay Macadka Heritage ayaa ayana xustay in nidaamka qabiilka iyo xiriirrada siyaasadeed ay si toos ah u saameeyaan ama ugu lug-leeyihiin magacaabista xilalka dowladda heerarkeeda kala duwan.

Dhammaan qodobbada kore waxa ay isku raacsanyihiin in nidaamka shaqaalaysiinta Soomaaliya uu yahay mid ku dhisan danaysi, eex, nin-jecleysi iyo dano gaar ah ee aan ee la eegin mudnaanta qofka iyo waxa uu ku soo kordhin karo jagada loo dhiibayo.

## XAALKA XULASHADA EE PUNTLAND WAA SIDEE?

Si aan si fudud ugu fahanno xaaladda Puntland aan soo qaadanno isku-shaandhayntii dhawaan ka dhacday Puntland taas oo noqotay mid taariikhda gashay. Qabiillada Puntland ayaa uga soo horjeestay si aan abid looga soo hor imaan wareegto dowladeed. Waraaqo isku mid ah oo aad mooddid in ciwaannada iyo magacyada reeraha la kala beddelay ayaa si is-dabo-joog ah ugu soo hoobtay baraha bulshada. Shirarka jaraa’id iyo kulamada tooska ah ee beelaha ayaa iyaguna noqday kuwa aan loo aabbo-yeelin. Reer walbaa waxa uu ku gooddiyey in uu qaadi doono tallaabo aan la mahadin haddii uusan helin saamigii uu mudnaa. Taariikhda waa markii ugu horraysay oo ay beelaha Puntland sidaan oo kale yeelaan. Nin dhallinyaro ah oo ka mid ah beelaha waraaqaha soo qoray ayaa aan weyddiiyey: “Maxay tahay sababta beeshaadu u cabanayso?” waxa uu iigu jawaabay: “Beeshaydu waxa ay xaq u leedahay wasiir. Wasiirkana waxa aan ka rabnaa in uu dhallinyarada beesha shaqaalaysiiyo reerkuna qaaraanka ka qaato, sidoo kale xilalkii hadda waxa ay noqdeen wax baraha bulshada looga faano, marka ma mudnin in reer hebel helaan annaguna weyno”. Waa jawaab si cad u muujinaysa heerka hab-fikirka oo ay bulshadeennu joogto. Waa arrin aad looga naxo in masuulkii laga rabay in uu hoggaamiyo hay’ado dowladeed oo bixiya adeeg hufan oo loo simanyahay maanta laga filayo in uu beeshiisa shaqo la raadiyo qaarankana bixiyo.

Cilmi-baaris uu sameeyey Mohamed Ahmed Mohamed (2018) ciwaanna looga dhigay “Public Sector Employment and Clan Dynamics in Puntland” ayaa si cad u sheegtay in shaqaalaysiinta masuuliyiinta Puntland lagu saleeyo la tashiyo oday dhaqameed iyo danta hoggaamiyaha markaas jooga uu ka leeyahay booska uu magacaabayo. Taas oo gabi ahaanba ka soo horjeedda mabda’a mutaysiga iyo aan faa’iidooyinkiisa soo xusnay.

Xulashada qof aan ahayn kii shaqada mudnaa oo lagu keenay dano gaar ah oo ay ka mid yihiin; qancin oday dhaqameed, ciidan meel xirtay, xigto, ama dan u gaar ah hoggaanka markaas xilka jooga ayaa sababta in ay meesha ka baxdo adeeg bixintii dowladda looga fadhiyey, musuqmaasuqu bato, xafiisyadana ay buux dhaafiyaan shaqaale aan aqoon iyo karti toonna u lahayn shaqada loo dhiibay.

## GUNAANAD

Marka la eego xaaladda Soomaaliya guud ahaan iyo Puntland gaar ahaan, waxaa muuqata farqi weyn oo u dhexeeya mabda’a mutaysiga iyo hab-dhaqanka dhabta ah ee ka jira xulashada masuuliyiinta. Nidaamka ku dhisan qabiil, eex iyo dano gaar ah ayaa si weyn u wiiqaya awoodda hay’adaha dowliga ah, wuxuuna caqabad ku noqday horumar waara iyo adeeg bulsho oo dhammaystiran.

Haddaba, haddii la doonayo isbeddel dhab ah, waxaa lama huraan ah in dib loo eego habka shaqaalaysiinta iyo magacaabista xilalka dowladda, lana hirgeliyo nidaam cad oo ku saleysan mutaysi, isla markaana laga fogeeyo faragelinta qabiilka iyo danaha gaarka ah. Sidoo kale, doorka aqoonyahanka, bulshada rayidka ah iyo dhalinyarada ayaa muhiim u ah wacyigelinta iyo riixidda isbeddelkan.

Gebogabadii, mustaqbalka dowladnimo ee Puntland iyo Soomaaliya guud ahaan waxa uu si toos ah ugu xiranyahay awoodda ay u leeyihiin inay ka gudbaan nidaamka danaysiga una gudbaan nidaam ku dhisan mutaysi. Taasina waa jidka keliya ee lagu gaari karo dowladnimo dhab ah.

**W/Q:** Bashiir Suuley

# **PUNTLAND:** CAQADAHA HORTAAGAN KA-GUDBIDDA NIDAAMKA QABIILKA IYO HIGSIGA DAWLADNIMO KU DHISAN HAY'ADO (INSTITUTIONALIZATION)



Sakariya Axmed Maxamed (Rabiic)



**Xigashada Sawirka**: AI Gen

## HORDHAC IYO GUN-DHIGGA TAARIIKHIGA AH

Muddo ka badan rubuc qarni ayaa ka soo wareegtay markii la aasaaasy Puntland, xilli ay rajadu ahayd in ay noqoto tusaale ku dayasho mudan oo ka tarjumaya dib-u-dhiska dowladnimo Soomaaliyeed oo ku salaysan nidaam iyo kala dambayn. Sannadahaas dheer, waxaa jiray horumarro la taaban karo oo dhinacyada amniga, maamulka, iyo xasilloonida ah, balse dhinaca kale waxaa si qoto dheer u soo ifbaxay dhibaato nidaamsan oo ku baahday laf-dhabarta dowladnimada. Dhibaatadaas ma aha mid ku kooban hal waax ama hal heer, balse waa mid si guud u taabatay hab-fikirka siyaasadeed, qaab-dhismeedka hay'adaha, iyo kalsoonida bulshada. Inkasta oo la dhisay xafiisyo iyo dhismayaal, haddana nuxurka dawladnimada oo ah Institutionalization—waa marka ay hay'aduhu ka awood badnaadaan shakhsiyaadka iyo qabaa'ilka—ayaa weli ah mid aan si dhab ah loo hirgelin.

## ISKU-DHACA NIDAAMYADA IYO CAQABADAHA QAAB-DHISMEEDKA

Xuddunta dhibtu waa isku dhaca u dhexeeya laba nidaam oo aan si fudud isu qaadan karin: nidaamka qabiilka iyo dowladnimada casriga ah. Qabiilku waa xaqiiqo bulsheed oo taariikh dheer leh, waana qaab ay bulshada Soomaaliyeed muddo dheer ku maareyn jirtay xiriirkeeda, khilaafaadkeeda, iyo is-difaaceeda; laakiin marka uu qabiilku noqdo saldhigga go'aan qaadashada dowladeed, wuxuu si toos ah u wiiqaa mabda'a dawladnimo ee ku dhisan sinnaan, caddaalad, iyo hufnaan. Jagadii dowladeed oo noqota mid lagu saleeyo cidda uu qofku ka dhashay halkii laga eegi lahaa kartidiisa iyo aqoontiisa, waxay dhaawacdaa tayada maamulka waxayna niyad jab ku abuurtaa qaybaha bulshada ee aan helin fursad siman. Tani waxay dhashay nidaam ah "kooxaysi", halkaas oo kooxo yari ay adeegsadaan magaca beesha si ay u xakameeyaan kheyraadka, iyagoo dareenka qabiilka u isticmaala gaashaan ay kaga baxsadaan xisaabtanka iyo sharciga.

## DHIBAATADA HAY'ADAHA IYO MAAMUL-XUMADA

Dhibaatooyinku kuma ekaan keliya habka xilalka loo qaybsado, balse waxay si qoto dheer ugu milmeen habdhaqanka hay'adaha dowliga ah, kuwaas oo mararka qaar noqda kuwo aan si buuxda u madaxbannaanayn. Marka hay'aduhu noqdaan kuwo ku shaqeeya cadaadis siyaasadeed ama mid qabiil, waxay lumiyaan awooddii ay ku ilaalin lahaayeen sharciga iyo nidaamka. Garsoorka oo aan helin madax-bannaani buuxda, iyo hay'adaha fulinta oo lagu dhex milo dano gaar ah, waxay abuuraan jawi uu sharcigu noqdo mid la kala dooran karo, halkii uu ka ahaan lahaa mid lagu wada dhaqmo. Muuqaalkaas daciifnimada hay'adaha waxaa sii xoojiya musuqmaasuq si joogto ah u saameeya habsami u socodka dowladnimada. Maamulka kheyraadka oo aan hufnayn, qandaraasyada oo lagu bixiyo xiriir iyo eex, iyo xisaabtan la'aanta joogtada ah, waxay si toos ah u wiiqaan kalsoonida dadweynaha, iyadoo inta badan musuqmaasuqa lafteeda lagu difaaco dareen qabiil, taas oo ka dhigaysa arrinta mid adag in si dhab ah loo wajaho.

## SIYAASADDA IYO TARTANKA KU SALAYSAN ISBAHAYSIGA

Dhinaca kale, siyaasadda Puntland waxay weli si weyn ugu tiirsantahay isbahaysiyo qabiil, taas oo ka dhigtay tartanka siyaasadeed mid ku wareegaya "cidda yaa mataleysa" halkii uu ka ahaan lahaa mid ku saleysan aragtiyo iyo barnaamijyo wax ku ool ah. Ololeyaasha siyaasadeed ee ku dhisan dareen qabiil waxay hoos u dhigaan tayada dimuqraadiyadda, waxayna xannibaan kobaca nidaam siyaasadeed oo caafimaad qaba. Marka hoggaanka lagu doorto qaabkan, waxaa yaraata isla xisaabtanka, maadaama taageeradu aysan ku imaan waxqabad balse ay ku timaaddo isku xirnaan bulsheed. Taariikhda dowlad-dhiska adduunka waxay muujinaysaa in isbeddelka noocan ahi uu mar walba la yimaado halgan dheer oo u dhexeeya dhaqanka soo jireenka ah iyo nidaamka cusub, Puntland-na kama reebna xeerkan guud ee u baahan in looga gudbo geesinimo siyaasadeed oo dhab ah.

## JIDKA XALKA: ISBEDDELKA IYO DIB-U-HABAYNTA

Si loo dhiso dowlad ku salaysan hay'ado shaqeynaya iyadoo aan la iska indha tirin xaqiiqada qabiilka, waa in la helaa isbeddel tartiib-tartiib ah oo ka bilaabma wacyigelin bulsho, kuna dhammaada dib-u-habayn hay'adeed oo dhab ah. Waxaana lagu gaari karaa hirgelinta doorashooyin hufan oo ku saleysan codka shacabka, taas oo meesha ka saarta dhex-dhexaadnimadii odayaasha qabiilka, kana dhigaysa mas'uulka mid u adeega muwaadinka si uu codkiisa u helo. Isla markaana, waa in la dhisaa shaqaale rayid ah oo ku yimaada tartan furan (Meritocracy), si loo kala saaro adeegga dadweynaha iyo saami-qaybsiga beelaha. Marka hay'adaha dowliga ah, gaar ahaan garsoorka iyo hanti-dhawrka, la siiyo madax-bannaani dhab ah, waxay awood u yeeshaan inay noqdaan kuwo lagu kalsoonaan karo oo si siman u dhaqangeliya sharciga, iyadoo la dagaalanka musuqmaasuqu uu noqonayo tiirka koowaad ee lagu dhisayo kalsoonida shacabka.

## GUNAANAD IYO RAJADA MUSTAQBALKA

Ugu dambayn, inkasta oo dhalinyarada iyo aqoonyahanka lagu tilmaamo tiirka ugu muhiimsan ee isbeddelka, haddana xaqiiqdu waxay tahay in aysan gebi ahaanba ka marnayn dhibaatooyinka jira; qayb ahaan waxay iyaguna ku dhex milmeen saameynta qabiilka iyo nidaamka taban ee soo jireenka ah. Taasi se kama dhigna in doorkoodu yaraado, balse waxay muujinaysaa baahida loo qabo in ay si miyir leh u qaataan masuuliyaddooda taariikhiga ah.

Dhalinyarada iyo aqoonyahanku waa in ay ka gudbaan xayndaabka qabiilka, kana hormariyaan danta guud, iyagoo ka faa'iidaysanaya fahamkooda casriga ah iyo xiriirkooda ballaaran, waxay awood u leeyihiin in ay dhisaan dhaqan siyaasadeed oo cusub oo ku saleysan hufnaan, isla xisaabtan, iyo caddaalad.

Puntland maanta waxay u baahantahay jiil ay si dhab ah uga go'an in uu jebiyo wareegga dhibaatooyinka soo noqnoqday. Sii wadista nidaamka hadda jira waxay sii xoojinaysaa caqabadaha, halka u gudubka dowladnimo ku dhisan hay'ado iyo sharci uu u baahanyahay geesinimo, dulqaad, iyo go'aan mideysan. Isbeddel dhab ah ma yimaado hal mar, balse wuxuu ka dhashaa dadaal joogto ah iyo rabitaan dhab ah oo lagu dhisayo mustaqbal ka duwan kii hore—mustaqbal uu muwaadinku yahay udub-dhexaadka xuquuqda iyo waajibaadka, hay'aduhuna ay yihiin ilaaliyeyaasha caddaaladda.

**W/Q:** Zakariye Xaaji Axmed iley " Rabiica"



# DIB-U-MILICSIGA TAARIIKHDA SOOMAALIYEED:
## SHIIKH CABDULCASIIS AL-MAQDISHAWI



Dr. Cabdiraxmaan Baadiyow



Xigashada Sawirka: AI

## HORDHAC

Taariikhda Soomaaliya ee xilligii dhexe (medieval period) weli si buuxda looma diiwaangelin, hase yeeshee qaybo ka mid ah qoraallo taariikheed, sheekooyin afeed, iyo warbixinno safarley ayaa suurtagelinaya in dib loo dhiso kaalinta ay culimada Soomaaliyeed ku lahaayeen dunida Islaamka. Qoraalkan wuxuu diiradda saarayaa nolosha iyo dhaxalka Shiikh Cabdulcasiis Al-Maqdishawi, isagoo muujinaya sida uu uga mid ahaa culimada Soomaaliyeed ee saameynta fog ku yeeshay gobolka Badweynta Hindiya, gaar ahaan Maldives.

## 1.MUQDISHO IYO BANAADIR: XARUMO CILMIGA IYO GANACSIGA

Xilligii dhexe, Muqdisho iyo guud ahaan gobolka Banaadir waxay ahaayeen xarumo istaraatiiji ah oo isku xira ganacsiga, diinta, iyo aqoonta, iyagoo door muhiim ah ka ciyaaray shabakadaha dhaqaalaha iyo dhaqanka ee Badweynta Hindiya. Magaalooyinka sida Baraawe, Marka, iyo Muqdisho waxay hoy u ahaayeen goobo waxbarasho oo horumarsan, halkaas oo ardaydu si nidaamsan ugu baran jireen Qur'aanka, xadiiska, fiqiga Islaamka, iyo culuum kale oo diini ah, iyagoo ka faa'iidaysanaya hagidda culimo aqoon sare leh. Isla mar ahaantaana, deegaannadani waxay lahaayeen xiriir ganacsi oo xooggan oo kala dhaxeeyay Bariga Afrika, Koonfur Aasiya, Jaziiradda Carabta, iyo jasiiradaha Badweynta Hindiya, taas oo sahashay isu socodka ganacsatada, culimada, iyo fikradaha. Isku dhafka dhaqdhaqaaqa ganacsi iyo firfircoonida aqooneed ayaa Banaadir ka dhigay deegaan soo saara culimo leh aragti caalami ah iyo dhaqan dhaqdhaqaaqeed, kuwaas oo safarro dheer ku tegi jiray dalal fog si ay u faafiyaan diinta Islaamka, u gudbiyaan aqoonta, isla markaana uga qayb qaataan dhismaha isku-xirnaanta bulshooyinka kala fog.

## 2.NOLOSHA IYO WAXBARASHADA SHIIKH CABDULCASIIS

Shiikh Cabdulcasiis Al-Maqdishawi wuxuu ku dhashay Muqdisho qarnigii 14aad, halkaas oo uu ku helay aasaaska waxbarashadiisii diineed iyo aqooneed ee hore, isaga oo ku barbaaray deegaan caan ku ahaa cilmiga Islaamka iyo dhaqanka waxbarasho ee hodanka ah. Wuxuu Qur'aanka Kariimka ah xifdiyay yaraantiisii, kadibna si qoto dheer ugu takhasusay culuumta Islaamka sida xadiiska, fiqiga, iyo tafsiirka, isagoo ka faa'iidaysanaya duruufaha waxbarasho ee ka jiray xarumaha cilmiga ee Banaadir. Intii uu joogay Soomaaliya, wuxuu ka mid noqday culimada wax ka dhigta xeebaha, halkaas oo uu door muuqda ka qaatay fidinta aqoonta iyo hanuunka bulshada, isla markaana uu saameyn togan ku yeeshay nolosha diineed iyo akhlaaqeed ee dadka deegaanka. Inkasta oo xogta taariikhiga ahi ay weli koobantahay oo aan si buuxda loo diiwaangelin, haddana tilmaamaha la heli karo waxay muujinayaan in Shiikh Cabdulcasiis uu ka tirsanaa culimada safarka badan ee xilligaas, kuwaas oo isku daray barashada iyo baridda cilmiga, faafinta diinta (dacwo), iyo ka qayb qaadashada maamulka caddaaladda ee bulshooyinka ay gaareen.

## 3. SAFARKIISA BADWEYNTA HINDIYA IYO DOORKIISA MALDIVES

Mid ka mid ah astaamaha ugu muhiimsan ee nolosha Shiikh Cabdulcasiis Al-Maqdishawi ayaa ahaa safarkiisii dheeraa ee uu ku gaaray Maldives, oo ku taalla qiyaastiina 3,000 km koonfur-bari kaga beegan Muqdisho, safar ka tarjumaya xiriirradii xoogganaa ee ganacsi iyo aqooneed ee ka jiray Badweynta Hindiya xilligii dhexe. Maldives waxay waqtigaas ahayd xarun ganacsi oo istaraatiiji ah, isla markaana ahayd bulsho Muslim ah oo si firfircoon ula xiriirtay dunida Islaamka, taas oo ka dhigtay meel soo jiidata culimo iyo ganacsato ka kala yimid gobollo fog. Markii uu gaaray jasiiradda Utheemu, Shiikh Cabdulcasiis waxaa loo magacaabay qaaddi (garsoore sare), xil muujinaya kalsoonida lagu qabay aqoontiisa diineed iyo kartidiisa hoggaamineed. Doorkiisa qaaddinimo wuxuu isku darayay fahamka qoto dheer ee shareecada Islaamka iyo maaraynta arrimaha bulshada, isagoo xallin jiray khilaafaadka, ilaalin jiray caddaaladda, isla markaana abuuri jiray jawi aqooneed oo uu ku soo dhoweeyo culimo iyo safarley. Saameyntiisa waxay si cad u muujinaysaa kaalinta firfircoon ee culimada Soomaaliyeed ay ku lahaayeen gudbinta aqoonta, hirgelinta nidaamyada caddaaladeed, iyo

dhismaha hay'adaha bulsho ee ka baxsan xuduudaha Soomaaliya, iyagoo qayb ka ahaa shabakado caalami ah oo isku xira dunida Islaamka.

## 4. XIRIIRKA CAALAMIGA AH: KULANKII IBNU BATTUUTA

Intii uu joogay Maldives, Shiikh Cabdulcasiis Al-Maqdishawi wuxuu la kulmay safarleyga caanka ah ee Ibnu Battuuta qarnigii 14aad, kulan ka tarjumaya heerka sare ee isku xirka aqooneed iyo dhaqan ee dunida Islaamka xilligii dhexe. Is-dhexgalka noocan ah wuxuu muujinayaa sida culimo iyo safarley ka kala yimid gobollo fog ay u samayn jireen shabakad isdhaafsi oo ku dhisan aqoon, waayo-aragnimo, iyo dhaqammo kala duwan, taas oo kor u qaadday fahamka iyo isdhexgalka bulshooyinka Islaamka. Warbixinnada Ibnu Battuuta, oo ka mid ah ilaha ugu muhiimsan ee taariikhda safarrada, waxay si gaar ah u iftiiminayaan joogitaanka culimada Soomaaliyeed ee meelaha fog sida Maldives, iyagoo muujinaya doorkooda firfircoon ee gudbinta aqoonta iyo hirgelinta nidaamyada diineed iyo bulsheed. Sidaas awgeed, kulankaas wuxuu noqday astaan muujinaysa kaalinta muhiimka ah ee Soomaaliya ay ku lahayd shabakadaha caalamiga ah ee aqoonta, ganacsiga, iyo diinta ee xilligaas.

## 5. DHAXALKA MUQDISHO: MASAAJIDKA SHIIKH CABDULCASIIS

Dhaxalka Shiikh Cabdulcasiis Al-Maqdishawi wuxuu weli si muuqata uga dhex iftiimaa magaalada Muqdisho, gaar ahaan Masaajidka Shiikh Cabdulcasiis ee ku yaalla degmada Cabdulcasiis, kaas oo noqday astaan taariikheed iyo mid diineed oo si qoto dheer ugu xiran xusuusta magaalada. Inkasta oo masaajidkan la dhisay kahor dhalashadiisa, haddana waxaa loogu magac daray si sharaf iyo xus u muujinaysa kaalintii weynayd ee uu ku lahaa faafinta cilmiga iyo diinta Islaamka. Muddo qarniyo ah, masaajidkani wuxuu sii waday doorkiisii ahaa xarun waxbarasho iyo cibaado, halkaas oo jiilal kala duwan ay ku barteen Qur'aanka iyo culuumta Islaamka, isagoo ilaalinaya hiddaha aqooneed ee Banaadir. Maanta, masaajidku wuxuu ka mid yahay astaamaha taariikhiga ah ee Muqdisho, waxaana booqda dad danaynaya taariikhda iyo dhaqanka magaalada. Sidoo kale, degmada uu ku yaallo ayaa loo bixiyay magaca Shiikh Cabdulcasiis, taas oo ka tarjumaysa saameynta joogtada ah ee uu ku leeyahay aqoonsiga diineed, dhaqan, iyo bulsheed ee Soomaaliya.

Waxaa kale oo xusid mudan in qarnigii 14aad uu jiray shiikh Soomaaliyeed oo ka mid noqday silsiladda culimada safarka badan ee dunida Islaamka. Waa Shiikh Saciid al-Muqdishawi, kaas oo la kulmay Ibnu Battuuta sanadki 1331. Ibnu Battuuta wuxuu si qoto dheer oo xiiso leh u dhegeystay sheekooyinka iyo waayo-aragnimada uu la wadaagay Shiikh Saciid, kaas oo uga warramay Bariga fog, gaar ahaan siyaasadaha adag ee Boqortooyadii Yuan, (1271–1368), oo uu aasaasay Kublai Khan. Sida uu tilmaamay Peter Jackson, waxaa la rumeysanyahay in sheekooyinka iyo faahfaahinta uu Ibnu Battuuta ka helay Shiikh Saciid ay door weyn ka ciyaareen fahamkiisa ku saabsan Shiinaha xilligii Yuan, taas oo uu markii dambe ku soo bandhigay safar-qoraalkiisii caanka ahaa ee "Rihla".

## 6. GUNAANAD

Shiikh Cabdulcasiis iyo Shiikh Saciid waxay tusaale u yihiin kaalinta culimada Soomaaliyeed ee xilligii dhexe, gaar ahaan kuwa ka soo jeeday Muqdisho, kuwaas oo si wax ku ool ah iskugu xiray aqoonta, diinta, iyo dhaqdhaqaaqa caalamiga ah. Waxay muujinayaan doorka muhiimka ah ee Soomaaliya ku lahayd shabakadaha aqooneed iyo ganacsi ee Badweynta Hindiya, iyagoo ka qayb qaatay fidinta aqoonta, faafinta diinta, iyo isdhaafsiga fikradaha ee dunida Islaamka. Labada shiikh waxay sidoo kale la kulmeen Ibnu Battuuta, iyagoo ku kordhiyay macluumaad qoto dheer oo ku saabsan Bariga fog, nidaamyada bulsho, iyo dhaqamada kala duwan, taas oo uu si weyn uga faa'iidaystay qoritaanka kitaabkiisa caanka ah ee "Rihla". Doorkoodu wuxuu muujinayaa sida culimada Soomaaliyeed ay u ahaayeen il muhiim ah oo aqoon iyo waayo-aragnimo laga dhaxlo, kana qayb qaata samaynta fahamka juqraafiyeed iyo dhaqan ee dunida Islaamka xilligii dhexe. Dhaxalkoodu wuxuu caddeyn u yahay awoodda aqoonta iyo dhaqdhaqaaqa culimada Soomaaliyeed ee isku xira bulshooyin kala fog, isla markaana weli dhiirrigeliya jiilalka maanta.

# KHAYRAADKA KALLUUMAYSIGA SOOMAALIYA:
## MAXAA KA HOR TAAGAN KA FAA'IIDAYSIGIISA, MAXAASE FURSADO AH OO JIRA?



Axmex Siciid Aw-nuur



Xigashada Sawirka: Rueters

# HORDHAC

Soomaaliya waa dalka leh xeebta ugu dheer Afrika. Dhulka Soomaaliya wuxuu si ballaaran ugu teedsan yahay Badweynta Hindiya iyo Gacanka Cadmeed. Sida ay marar badan sheegtay hay'adda Qaramada Midoobay u qaabilsan cuntada iyo beeraha (FAO), Soomaaliya waxay leedahay khayraad kalluun oo aad u badan, balse aan weli si buuxda looga faa'iidaysan. Badda Soomaaliya waxay hodan ku tahay noocyo kala duwan oo kalluun ah, kuwaas oo ay ka mid yihiin kalluunka biyaha sare mara (pelagic fisheries), qolofleyda sida aargoostada, iyo kalluunka gunta badda ku nool (demersal fish), iyo noocyo kale oo badan. Sida ay qiyaastay FAO, Soomaaliya waxaa sannadkii laga soo saari karaa ilaa 200,000 tan oo kalluun ah, hase yeeshee wax-soo-saarka hadda jira aad ayuu uga hooseeyaa heerkaas.

Waxaa jira dabaylo iyo mawjado si gaar ah iyo xilliyo gaar ah ka dhaca badda Soomaaliya gaar ahaan xeebaha Puntland (Upwelling, seasonal ocean currents), dabaylahaas waxay ka soo qaadaan nafaqada kalluunku u baahan yahay gunta hoose ee badda isla markaasna kor u soo saaraan, khaas ahaan dabaylahaas waxay ka dhacaan Badweynta Hindiya. Nafaqadaas dabayluhu sababeen ayaa soo jiita kalluun tiro badan, waana middaas sababta ay Soomaaliya wax-soo-saar kalluun oo badan ay u yeelatay adduunka oo dhanna looga soo shaqo tagay si loo boobo Khayraadkaas ay Soomaalidu ka faa'iidaysan weyday.

Haddaba, Soomaaliya waxay khayraadkaas kalluunka ee Ilaahay ku mannaystay uga faa'iidaysan kartaa dhinacyo badan, oo ay ka mid yihiin sugnaanta cuntada (food security). Dadka iyo xoolaha labadaba waxaa laga samayn karaa cunto nafaqo leh. Waxaa jira warbixino badan oo sheegaya in haraaga kalluunka ee la qubo (fish waste) loo diyaarin karo loogana dhigi karo cunto (fish meal) xoolaha ay Soomaalidu dhaqato, kuwaas oo waqtiyadan dambe ay soo wajahday abaaro tira badan oo sababay in xoolihii Soomaalidu ay gaajo u dhamaadaan.

Arrinta labaad ee looga faa'iidaysan karo waa shaqo-abuurka iyo kobcinta dhaqaalaha. Haddii la abuuro warshado kalluunka hagaajiya oo si tayo leh, kuna habboon cunista aadanaha loo diyaariyo, kalluumaysigu wuxuu noqon karaa il dhaqaale oo ka qayb qaadata kobcinta dhaqaalaha dalka Soomaaliya, isla markaana soo gelisa lacag adag.

Haddaba, inkastoo aan qormo kooban lagu soo koobi karin sababaha Soomaaliya uga faa'iidaysan weyday khayraadka kalluunka ee Ilaahay ku mannaystay, haddana waxaan isku dayi doonnaa inaan iftiiminno caqabadaha ugu waaweyn sida xasillooni-darrada siyaasadeed iyo amni-xumada, tabardarida hay'adaha, kalluumaysiga sharci-darrada ah, kaabayaasha liita, farsamada wax-soo-saarka, aqoonta iyo xirfadaha, maalgelinta, iyo suuq-geynta kalluunka.

# NABADGELYADA IYO XASILLOONIDA SIYAASADEED (SECURITY AND STABILITY)

Waxaa la isku waafaqsan yahay in Xasilloonida siyaasadeed ay keento jawi nabadgelyo, xasillooni iyo horumar, Soomaaliya kama jirto xasillooni siyaasadeed muddo ku dhow nus qarni, taasi waxay keentay dhibaatooyin fara badan sida xasillooni darro siyaasadeed, qalalaase amni, faragelin shisheeye, kala qoqobnaan dawladeed, dhaqaale xumo, musumaasuq iyo raja xumo guud ahaan ay qabaan dadka Soomaaliyeed khaasatan dhalinyarada.

Xasilloonida siyaasadeed waa furaha caqabad kasta oo maanta soomaaliya ay wajahayso kalluumaysiguna ka mid yahay. Soomaaliya si buuxda uma maamusho baddeeda mana xukunto ficil ahaan( Defacto) laakiin waxay u xukuntaa sharci ahaan maadama baddaas Soomaliya loo aqoonsan yahay ( de jure). Xasillooni darrada siyaasadeed waxay keentay in hay'adihii dawladda ee u xilsaarnaa ilaalinta badaha, kalluumaysiga sharci darada ah ay burburaan ama noqdaan kuwa aan lahayn awood waxqabad. Hay'adahaas waxaa ka mid ah ciidankii badda Soomaaliya oo u xilsaarnaa kormeerka iyo ilaalinta badda.

Waxaa abuurmay burcad-badeed ka hanaqaadday badda Soomaaliya, taasoo u keentay magac-xumo iyo ammaan-darro ummadda Soomaaliyeed. Waxay sababtay in dowlado shisheeye ay keenaan ciidamo ku sugan badda Soomaaliya, kuwaas oo la dagaallamay burcad-badeedda ka dillaacday badaha Soomaaliya, maadaama Soomaaliya ay awood u yeelan weyday inay xalliso dhibaatada ka dhacaysay baddeeda. Weli qaybo ka mid ah ciidamadaas ayaa ku sugan badaha Soomaaliya, iyagoo sheegaya inay u joogaan sugidda ammaanka badda Soomaaliya iyo ka hortagga in ay dib u soo laabato burcad-badeedii hore uga dillaacday geyiga Soomaaliya.

Hase yeeshee, waxaa xusid mudan in ciidamadaas aysan waxba ka qaban kalluumaysiga sharci-darrada ah ee ka socda badaha Soomaaliya, iyagoo ku

andacoonaya inaysan ka haysan dowladahooda waajibaad ay arrinkaas wax kaga qabtaan. Waxaa jira warbixinno sheegaya in maraakiibtaas laftoodu ay fududeeyaan kalluumaysi sharci-darro ah oo ka dhaca badda Soomaaliya, khaas ahaan aagga dhaqaalaha gaarka ah (exclusive economic zone) oo ay Soomaaliya sharciyan sheegato inay maamusho, isla markaana leedahay dhammaan khayraadka dabiiciga ah ee aaggaas ku jira. Waxaa kale oo xusid mudan in adduunku walaac weyn ka qabo arrimaha nabadgelyada badda Soomaaliya (maritime security), iyadoo la sheegayo inay jiraan dhoofin hub sharci-darro ah, gaar ahaan badda u dhexeysa Yemen iyo Soomaaliya, halkaas oo la aaminsan yahay in hub sharci-darro ah laga soo geliyo Soomaaliya si loogu isticmaalo colaadaha iyo amni-xumada dalka ka jira.

Ugu dambayntii, Soomaaliya waxay xuduud badeed (maritime borders) la leedahay Kenya, Yemen iyo Jabuuti. Waxaan ognahay in Kenya iyo Soomaaliya uu dhex maray muran xagga xuduudda badda ah, taas oo keentay in la isla tago Maxkamadda Adduunka, oo u xukuntay Soomaaliya inta badan dacwaddii ay soo bandhigtay, hase yeeshee Kenya kuma qanacsana. Waxaa kaloo jirta in aan si cad loo aqoon halka ay tahay xuduud-badeedka Soomaaliya iyo Yemen, iyo sidoo kale Soomaaliya iyo Jabuuti, mana muuqato in si dhab ah looga wada hadlay arrimahaas.

## TABARDARIDA AWOODDA MAAMUL EE HAY'ADAHA DOWLADDA EE U XILSAARAN KALLUUMAYSIGA (WEAK INSTITUTIONS AND FISHERIES GOVERNANCE)

Soomaaliya waxaa ka jira hay'ado dawladeed sida wasaaradda kaluumaysiga iyo dhaqaalaha buluugga ah oo ah heer dawlad federaal, waxaa kale oo jira wasaaradaha kalluumaysiga iyo khayraadka badda ee heer maamul goboleed ah, dhammaan hay'adahaas ma jiro siyaasad kalluumaysi (fisheries policy) oo ay isku waafaqsan yihiin sidoo kale ma jirto xeerar kalluumaysi (fisheries regulation) oo ay heshiis ku yihiin. Kalluumaysiguna sida hay'adaha kale oo dawladda wuxuu u baahan yahay siyaasad dawladeed iyo xeerar iyo shuruuc lagu maamulo isla markaasna ay jirto awood dhaqan gelin karta siyaasadaas iyo xeerakaas.

Mar haddii aysan jirin siyaasad iyo xeerar kalluumaysi oo Soomaalidu isku raacsantahay, sidoo kalena hay'adihii heer federaal iyo maamul goboleed aysan wada shaqayn fiican lahayn, isla markaasna u diyaarsnayn sidii la rabay, xuduuddii badda Soomaaliya ay la lahayd dalalka kale waxna muran kujiraan waxna aan la aqoon halka xuduud badeedku tahay, waxaa iska cad in ay wasaaradaha kalluumaysigu magac ahaan isaga jiraan laakinse aysan awood u lahayn inay qabtaan shaqadii looga baahnaa.

Soomaaliya, hay'adaha u xilsaaran kalluumaysigu ma laha awooddii iyo farsamadii ay ku ilaalin lahaayeen badda (monitoring, surveillance and control). Ciidanka baddana, sida aan kor ku soo sheegnay, ma laha awood ku filan, mana haystaan doonyo iyo maraakiib ay badda ku roondeeyaan, iyo sidoo kale qalab iyo farsamo lagula socdo dhaqdhaqaaqa ka socda badda, sida aaladda la socodka nidaamka maraakiibta (vessel monitoring system).

Sidoo kale, ma jiraan cilmi-baarisyo lagu go'aan qaadan karo oo lagu sameeyey khayraadka badda Soomaaliya, hay'adaha hadda jiraana uma diyaarsana, awoodna uma laha inay sameeyaan cilmi-baarisyadaas. Cilmi-baarista muhiimka ah waxaa ka mid ah la socodka kaydka kalluunka badda ku jira (fish stocks) iyo ururinta macluumaadka kalluumaysiga sida xaddiga kalluunka la soo qabto (catch volumes), ha ahaato mid laga soo dejiyo xeebaha ama ay qabtaan maraakiibta sharciga la siiyay. Haddii macluumaadkaas la uruurin lahaa oo cilmi-baaris laga samayn lahaa, waxay bixin lahayd xog muhiim ah oo ku saabsan xaaladda khayraadka badda Soomaaliya.

## KALLUUMASYIGA SHARCI DARADA AH (ILLEGAL, UNREPORTED, UNREGULATED FISHING)

Kalluumaysiga sharci darrada ah waa dhibaatada koowaad oo khayraadka badda Soomaaliya ay wajahayso. Hay'adda cuntada adduunka (FAO) waxay kallumaysiga sharci darrada ah ku qeexdaa inuu yahay "kalluumaysiga aan si sharci ah loo ogolaan , kalluumaysiga aan warbixin laga soo gudbin natiijadiisa (lack of reporting catches), kalluumaysiga ku xadgudba shuruucda dhowrista deegaanka iyo noolaha badda".

Hay'ado badan oo ay ka mid yihiin Hay'adda Cuntada Adduunka (FAO) iyo hay'adda Secure Fisheries ayaa qoray sannadkii 2014 in Soomaaliya si sharci-darro ah looga xaday kalluun ka badan 100,000 MT sanadkii; taasoo u dhiganta qiyaas dhan 300–400 milyan oo doolar sanadkii. Runtii, tuugadaas waxaa gacan weyn siiya dad Soomaaliyeed oo iyaguna dullaalo u ah maraakiibta iyo doonyaha shisheeye, kuwaas oo laba nooc isugu jira: kuwo sharci ka qaata maamullada dalka ka jira, gaar ahaan Dowladda Federaalka iyo Puntland, kuwaas oo bixiya oggolaansho maraakiib iyo doonyo ay kalluun kaga qaataan baddeena. Hase yeeshee, nasiib darro, maraakiibtaas iyo doonyahaas lama yaqaan cadadka kalluunka ay qaataan, maadaama aysan ku soo xiran dekedaha Soomaaliya si loo hubiyo in waxa ay soo jillaabteen ay waafaqsan yihiin ruqsaddii la siiyay.

Waxaa kale oo jira kuwo aan wax oggolaansho ah ka qaadan dowlad, heer kastaba ha ahaatee, kuwaas oo si toos ah u soo gala badda isla markaana gurta khayraadka kalluunka ee ku jira. Qaar waa doonyo yar-yar oo badanaa laga leeyahay Yemen, kuwaas oo ka kalluumaysta aagga 12 mayl illaa 50 mayl, iyo kuwo kale oo maraakiib waaweyn ah oo iyagu ka kalluumaysta aagga dhaqaalaha gaarka ah (exclusive economic zone).

**Kaabayaasha iyo ganacsiga kalluumaysiga oo liita (weak fisheries infrastructure and value chain)**

Dhibaatada kale oo kalluumaysiga Soomaliya uu wajahayo waxaa ka mid ah la'aanta adeegyada iyo kaabayaasha kalluunka sida dekedo yar yar oo kalluumaysi, Qaboojiyayaal kalluunka lagu kaydiyo (cold chain facilities) iyo meelo cayiman oo loo diyaariey in kalluunka laga soo dejiyo (fish landing sites). arrimahaas kama jiraan Soomaaliya sidaas darteed cidina awood uma laha inay kaydiso kalluun xaddi badan ah oo tayadiisa la xaqiijiyey iyo in la tira koobo cadadka kalluunka la soo qabto iwm. Arrintaasuna waa mid ka mid ah sababaha Soomaalidu kalluunkooda ugu dhoofin waayeen suuqyada caalamka.

**Awoodda iyo farsamada wax-soo-saarka kalluunka oo liidata (low fishing capacity and use of fisheries technology)**

Dadka Soomaaliyeed iyo shirkadaha kalluumaysiga ee Soomaalidu ma laha awood farsamo (fishing technology) oo ay kalluunka kula soo baxaan, sida qalab casri ah, doonyo iyo maraakiib qaban kara cadad kalluun oo badan. Taasi waxay keentay in wax-soo-saarka kalluunka ee dadka Soomaalidu uu noqdo mid aad u hooseeya, maadaama aysan haysan gaadiid iyo farsamo casri ah oo ay kula soo baxaan. Taas beddelkeeda, khayraadka inta badan waxaa gurta maraakiibta shisheeye oo leh qalab, farsamo iyo xirfad ay kula soo baxaan kalluunka. Taasina waa nasiib darro weyn, maadaama dadkii dhulka lahaa aysan waxba la soo bixi karin, halka shisheeyuhu guranayo khayraadkoodii. Arrintaasna waa masuuliyad ay ka gaabisay dowladda Soomaaliyeed, heer kastaba ha ahaatee.

**Aqoonta iyo xirfadaha la xiriira badaha iyo kalluumaysiga oo liita (low skills and professional knowledge of marine and fisheries)**

Aqoonta la xiriirta badaha iyo kalluumaysiga aad bay ugu yar tahay dadka Soomaaliyeed. Dadkii koobnaa ee aqoontaas bartay xilligii dowladihii hore maanta waa gaboobeen, qaarna way dhinteen. Soomaaliya kama jiraan dugsiyo sare iyo jaamacado si fiican loogu barto cilmiga badda iyo kalluumaysiga, haddii ay jiraanna waxtarkoodu waa hooseeyaa. Sidaas darteed, xirfadda iyo aqoonta badaha iyo kalluumaysigu waa caqabad aad u weyn oo jirta, kana mid ah caqabadaha haysta kalluumaysiga Soomaaliya.

Maalgelinta kalluumaysiga, hubinta tayada cuntada kalluunka, iyo gaarsiinta suuqyada kalluunka ee caalamka (fisheries investment, fish product quality, access to markets)

Kalluumaysigu wuxuu u baahan yahay maalgelin ka timaadda dowladda iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay labadaba. Si kastaba ha ahaatee, labaduba way ka gaabiyaan maalgelinta khayraadka kalluunka; taa beddelkeeda, ganacsatada Soomaaliyeed waxay si weyn u maalgashadaan dhismaha guryaha, xitaa iyagoo ku sameeya dalal shisheeye.

Kalluunka Soomaaliya wuxuu u baahan yahay in loo helo kaabayaal (fisheries infrastructure), qaboojiyayaal (cold chains), warshado kalluunka lagu farsameeyo (fish processing facilities), iyo in la kobciyo aqoonta iyo xirfadaha kalluumaysiga iyo khayraadka badda. Sidoo kale, waxaa muhiim ah in la horumariyo nidaamka soo qabashada, qaadista, iyo soo dejinta kalluunka meelo si gaar ah loo diyaariyey (fish landing sites). Haddii arrimahaas la maalgeliyo, waxay hagaajin karaan hubinta tayada kalluunka, taasoo keeni karta in kalluunka Soomaalidu gaaro suuqyada caalamka isla markaana uu dhaqaale wanaagsan dalka soo geliyo.

## GABAGABO

Haddii aan la helin ammaan iyo xasillooni siyaasadeed, aan laga bixin kala-qoqobnaanta iyo muranka macna-darrada ah, aan la dhisin hay'ado tayo leh oo Soomaaliyeed, isla markaana aan la dejin siyaasad iyo xeer kalluumaysi oo la isku waafaqsan yahay, siyaasaddaas iyo xeerarkaasna aan loo diyaarin awooddii iyo qaabkii lagu dhaqan gelin lahaa, aan la kobcin awoodda waxqabad ee hay'adaha kalluumaysiga u xilsaaran dhinacyada aqooneed, farsamo iyo maaliyadeed, isla markaana aan loo helin maalgelin kalluumaysiga Soomaaliya, tayadiisana aan kor loo qaadin si waafaqsan nidaamyada caalamiga ah ee hubinta tayada cuntada—intaas iyo wax ka badanba haddii aan si degdeg ah loo helin, Soomaaliya weligeed kama faa'iidaysan doonto khayraadka kalluunka ee Ilaahay ku mannaystay.

Taa beddelkeeda, waxaa ka faa'iidaystay kana faa'iidaysan doona shisheeye. Ugu dambayntii, xalku kama imanayo in shirkado ajnabi ah qandaraas lagu siiyo ama heshiis lala galo si ay wax uga qabtaan dhibaatooyinka aan kor ku soo sheegnay, gaar ahaan iyadoo nidaamka heshiisyadaasi yahay mid aan caddayn, oo ay ka muuqato mugdi iyo daahfurnaan la'aan. Puntland ayaa waddadaas hore u qaadday, balse kama faa'iidin; dad shaqsiyaad ah ayaa ka xoolaystay oo ku danaystay. Haatanna waxaa muuqata in dowladda federaalku ay isla waddadaas xal ka raadinayso. Si kastaba ha ahaatee, Puntland horay ayay ugu khasaartay isku daygaas, waqtigana ayaa muujin doona sida ay ku dambayn doonto, balse ma muuqato in shirkado shisheeye ay xallin karaan caqabadaha aan kor ku soo sheegnay.



# DHAQAN-SIYAASADEEDKA SOOMAALIDA: ISDHEXGALKA QABIILKA, XEERKA IYO DAWLAD-DHISKA CASRIGA AH



Dr. Maxamed Cali Faarax



# HORDHAC

Siyaasaddu waa tiir muhiim u ah nolosha bulshooyinka, culimada falsafada iyo taariikhdu siyaabo kala duwan ayay u qeexaan, iyadoo laga eegayo xiriirka ay la leedahay dawladnimada iyo awoodda, waxayse kusoo aruuraysaa in loo adeego bulshada si ay nolol fiican ugu noolaadaan; Caalimka la yiraahdo Jubaaci wuxuu siyaasadda ku qeexay: "Dariiqa lagu gaaro aqoonta dawladnimada; ha ahaato dadka, dhulka iyo nidaamka maamulka ee jira; iyadoo xoogga la saarayo maaraynta danaha bulshada", qaar kale waxay ku qeexaan inay tahay farsamada lagu xalliyo khilaafaadka. Dhinaca kale marka laga eego; siyaasaddu waa maaraynta awoodaha iyo in loo adeegsado sida ugu habboon oo ay ku jirto danta bulshadu, haddii kale waxay keeni kartaa burbur iyo xasillooni darro. Waxaa isna Qaamuuskiisa Af-soomaaliga ku macneeyey Keenadiid oo yiri siyaasaddu waa: "Cilmiga, farsamada iyo tabta danaha iyo arrimaha qaranka loo maamulo".

Siyaasadda waxaa haga qiyamka iyo akhlaaqda suubban ee ku cad diinteenna sharafta leh, Quraanka iyo Sunnadu meela badan ku tilmaameen, saxna maaha in dadka loo tuso in siyaasaddu tahay wax ku dhisan khiyaano iyo is-daba maryayn sida siyaasiyiinta Soomaalida qaarkood ku hadaaqaan, iyagoo oranaya: "Siyaasaddu moral shaqo kuma laha", waana fikirka Mikaafiili oo aaminsanaa in siyaasaddu aysan akhlaaq shaqo ku lahayn, isagoo ku sababaynaya in dadka sharku asal u yahay, ayna tahay in loo adeegsado awood iyo siyaasad aan naxariis iyo akhlaaq ku dhisnayn.

Dhaqan-siyaasadeedka oo ah cinwaanka maqaalkeennu waa: habka ay bulsho u fahanto, u wajahdo, uguna dhaqanto arrimaha siyaasadda. Soomaaliya, dhaqanka siyaasadeed wuxuu si weyn ugu xiran yahay nidaamka qabiilka iyo xeerarka dhaqanka. Sida uu sheegay M. I. Lewis (2002), bulshada Soomaalidu waa "segmentary lineage society" oo ku dhisan isir iyo qaraabo.

Maqaalkani wuxuu falanqaynayaa dhaqan-siyaasadeedka Soomaalida isagoo diiradda saaraya doorka qabiilka, xeerka dhaqanka, iyo dowlad-dhiska casriga ah. Ujeeddadu waa in la fahmo sida qaab-dhismeedka bulshada ee ku saleysan qabiilka uu u saameeyo hay'adaha dawliga ah iyo geeddi-socodka dimuqraadiyadda; inkasta oo qabiilku caqabad ku yahay dawladnimo mideysan oo casri ah, haddana wuxuu dhinaca kale leeyahay door wax ku ool ah oo lagu xasilin karo bulshada haddii si habboon loo maareeyo loona adeegsado.

Tan iyo burburkii dawladdii dhexe sanadkii 1991, Soomaaliya waxay la tacaalaysay dib-u-dhis dawladeed, iyadoo ay si joogto ah u saameynayaan qabiil, diin iyo faragelin dibadeed (Menkhaus, 2006). Sidaas darteed, fahamka dhaqan-siyaasadeedka Soomaalida wuxuu muhiim u yahay xalinta caqabadaha dawladnimo ee Soomaalidu la dhutinayso.

Daraasado badan ayaa diiradda saaray xiriirka ka dhexeeya qabiilka iyo siyaasadda Soomaaliya. Lewis (2002) wuxuu ku dooday in qabiilku yahay tiirka ugu muhiimsan ee bulshada. Dhanka kale, Samatar (1992) wuxuu tilmaamay in ku tiirsanaanta qabiilka ay burburisay hay'adihii dawliga ahaa.

Menkhaus (2006) wuxuu soo bandhigay fikradda "governance without government," taasoo muujinaysa in nidaamyo aan dowlad rasmi ah lahayn ay haddana shaqeyn karaan. Hoehne (2011) wuxuu isna caddeeyay doorka odayaasha dhaqanka ee xasilinta bulshada, gaar ahaan waqooyiga Soomaaliya.

# QABIILKA IYO DHAQAN-SIYAASADEEDKA SOOMAALIDA

Qaab-dhismeedka guud ee ay bulshada Soomaalidu u dhisantahay waxaa weeye: qaab-dhismeedka qabiilooyin kala duwan. Qabiil walba wuxuu leeyahay dano u gaar ah oo ka dhexeeya, oo ay iska kaashadaan; sida: magta, qaaraanka, difaaca, iwm, iyadoo ay danahaas gaarka ahi jiraan, haddana waxa jira dano kale oo aan ka dhaxaynin qabiilka. Inkastoo danaha qabiilka dhexdiisa aysan isku mid ahayn; haddana waxaad arkaysaa inta badan qof kasta oo qabiilka ka mid ahi wuxuu si gaar ah u taageersanyahay hoggaamiyaha siyaasadda ee ay isku beesha yihiin, waana waxa uu Cabdiraxmaan Xasan Daa'uud ugu yeeray: "Qab-dhalanteedka qabyaaladda", taasoo ku salaysan been lagu gardaadiyo, ama lagu barbaariyo carruurta yaryar ee Soomaalida. Waa dareen marwalba la xasuusiyo qofka Soomaaliga ah, ilaa iyo inta uu ka dhimanayo. Waa dardaaran uu qabiil waliba kula dardaarmo dadkiisa.

Qabiilku wuxuu asaas u noqday dhaqan-siyaasadeedka Soomaalida, iyadoo shirweynihii dib-u-heshiisiinta Soomaalida ee lagu qabtay Carto sanadkii 2000 laga dhigay dastuur in Soomaalidu

wax ku qaybsato qabiil oo marka la qurxinayo ama afka laga dhowrayo loogu yeero "wax-qaybsiga 4.5". Qof kasta oo siyaasadda uu damac kaga jiro wuxuu adeegsadaa qabiilka si uu helo metelaad siyaasadeed, waxaa qabiilku xalliyaa khilaafaadka beesha ka dhex jira iyo kuwa kala dhexeeya beelaha kale ee Soomaalida, wuxuuna saldhig u yahay qaybsiga awoodaha iyo khayraadka dalka ku jira.

Siyaasiyiin ku-sheegta Soomaalida ayaa ka faa'idaysta qabiilka marka ay ku tartamayaan awoodda dalka iyo boobka xoolaha ummadda, siyaasi walbaa wuxuu soo urursadaa qabiilkiisa; oo shuruud la'aan iyo indho-la'aan ku taageera siyaasigooda. Qabiilku wuxuu keenaa: qabyaalad indha la', kala-qaybsanaan siyaasadeed oo qabiil salka ku haysa iyo dawlad daciif ah oo aan tiir adag ku taagnayn.

## XEERKA DHAQANKA IYO DHAQAN-SIYAASADEEDKA SOOMAALIDA

Marka la eego taariikhda fog ee Soomaalida, taasoo salka ku haysa nolosha miyiga, waxaa kuu muuqanaya in xeerka dhaqanka Soomaalida iyo siyaasaddu ay yihiin laba shay oo si qoto dheer isugu xiran; iyadoo xeerku uu yahay saldhigga hab-nololeedka, garsoorka iyo nidaamka bulshada, siyaasadduna ay tahay maamulka awoodda iyo maaraynta talada dalka. Xeerka dhaqanku waa nidaam sharci-dhaqameed oo lagu maareeyo dilalka, khilaafaadka dhulka iyo biyaha iyo arrimaha bulshada.

Soomaaliya waxay leedahay dhaqan soo jireen ah oo ka tarjumaya heerarka kala duwan ee nololsha dadka Soomaaliyeed, wuxuu salka ku hayaa dadka reer guuraaga ah, beeralayda iyo dadka kalluumaysatada ah. Maadaama inta badan dadka Soomaaliyeed ay ahaayeen kuwo aan wax qorin, ayaa Soomaalidu waxay dhaqan u lahayd inay suugaanta noocyadeeda kala duwan isugu gudbiso farriimaha, iyagoo iska xogwaraysan jirey, iskuna maaweelin jiray Gabayada, Geeraarrada, Guurowga, Heesaha Sayliciga ah, Buraamburka, Jiiftada, Shirirbka, Dhaantada, Wilisiqada, Kabeebey, Saarka, Beerreyda, Jaandheerta iwm.

Geedka oo xeerka dhaqanku saldhig u yahay, waxa uu mar ahaa goobta lagu gooyo go'aannada muhiimka ah ee beeshu qaadanayso sida colaadda, dagaallada, heshiisyada iyo ganacsiga; sidoo kale wuxuu ahaa goob-garsoor (maxkamad) dadka lagu kala saaro, marna wuxuu ahaa gole wadatashi oo lagu xalliyo khilaafka beesha dhexdeeda ah ama kala dhexeeya deriskeeda. Sida badana geedka garta cidna lagama celin jirin oo waxa uu ahaa madal furan oo ay dhagaysigeeda dadku ka qaybgali karaan. Geedka waxaa ka garnaqi jiray xidaar aqoon ah, oo xirib iyo xilkasnimo lagu majeerto, xurmana ku dhex leh golayaasha lagu galgaal-bixiyo doodaha bulshada ka dhex aloosan.

## DAWLADNIMADA CARSIGA AH IYO HAB-DHAQANKA SIYAASADEED EE SOOMAALIDA

Dawladnimada casriga ah iyo hab-dhaqanka siyaasadeed ee Soomaalida waa mawduuc isku xira laba arrimood oo waaweyn: dhismaha dawlad casri ah (modern statehood), iyo dhaqanka siyaasadeed ee bulshada Soomaaliyeed oo leh taariikh iyo astaamo gaar ah oo ka dhashay duruufaha kala duwan ee ay soo martay bulshadeennu.

1. **Dawladnimada Casriga ah (Modern Statehood):**

   Dawladnimada casriga ahi waxay ku dhisan tahay mabaadi' caalami ah sida:

   - Sharciyad (Rule of Law): Sharcigu waa inuu ka sarreeyaa qof kasta, qof walbana waa inuu u hoggaansamaa si loo xaqiijiyo caddaalad, horumar, iyo nolol wanaagsan.
   - Hay'ado Dastuuri ah: Dalka waa inuu yeeshaa hay'ado dowladeed oo kala madax-bannaan, isla markaana is-korjoogteeya, kana masuul ah fulinta waajibaadka iyo shaqada dowladda loo igmaday.
   - Dimuqraadiyad: Dadku waa inay leeyihiin awoodda doorashada, si ay u soo doortaan cidda matalaysa, uguna igmadaan maamulka iyo hoggaanka dalka.
   - Xuduud iyo Qarannimo: Dowladda waa inay lahaataa xuduud cad iyo aqoonsi caalami ah, sidoo kalena awood u yeelataa ilaalinta xuduudaheeda iyo madaxbannaanideeda.

Soomaaliya waxay qaadatay nidaam dawlad casri ah markii ay xornimada ka qaadatay gumaysigii Talyaaniga iyo Ingiriiska 1960-kii, iyadoo markaas la dhisay dawlad dastuuri ah balse aan hanaqaadin, burburna ku yimid sanadkii 1991-dii, kaasoo raadkiisii weli kasii muuqdo dawladnimada Soomaaliya.

2. **Hab-dhaqanka siyaasadeed ee Soomaalida:**

   Dhaqan-siyaasadeedka Soomaalidu wuxuu ku salaysan yahay:

   - Qabiil iyo reernimo door weyn ku leh go'aan-qaadashada iyo dawlad-dhiska.
   - Wadatashi (shir) oo ah dhaqanka odayaasha iyo heshiis raadinta.
   - Xeerka dhaqanka oo inta badan lagu xalliyo khilaafaadka beelaha ka dhex dhaca.

Waxaa halkaas nooga muuqanaya in dawladnimada Soomaalidu ay tahay mid isku-dhaf ah: nidaam casri ah oo dastuuri ah oo leh dhammaan hay'adihii dawliga ahaa sida Baarlamaanka, Garsoorka, iyo Fulinta; waxaana barbar socda xeerka dhaqanka oo qabiilka salka ku haya, kana qayb weyn ka qaata xallinta khilaafaadka beelaha iyo daminta colaadaha.

## GUNAANAD

Dhaqan-siyaasadeedka Soomaalida waa mid isku-dhafan oo u baahan faham qoto dheer iyo in daraasado mug leh laga sameeyo sida loo maareyn karo, loo heshiisiin karo, laysuguna hayn karo qabiilka, xeerka dhaqanka, iyo dawladnimada casriga ah. Waa arrin u baahan inay bulshadeenna ka dhaadhacdo in qofku, isagoo qabiil leh, diin leh, iyo dhaqan suubban leh, haddana uu qayb ka noqon karo dawlad casri ah oo jirta. Qabiilka iyo xeerku ma aha oo keliya caqabado, balse sidoo kale waa aalado muhiim ah oo lagu dhisi karo nabad, xasillooni siyaasadeed, iyo dawladnimo waarta.

## TIXRAAC:


1. جدلية العلاقة بين السياسة والأخلاق والفكر عند جاد الكريم الجباعي
2. Yaasiin C. Keenadiid, 1976, Qaamuuska Af-soomaaliga
3. Ken Menkhaus, 2006, Governance without government in Somalia; Spoilers, State Buildign, and the Politics of Coping.
4. M.I. Lewis, 2002, Modern State of Somalia.
5. Cabdiraxmaan Xuseen Daa'uud, 2010, Dhaliisha Dhaqanka Soomaalida
6. Xeerka Siyaasadda Dhaqanka ee Soomaaliya, 2023.




# ISKU-DHAFKA WAXBARASHADA IYO TIKNOOLOJIYADDA:

## QAAB-DHISMEED LAGU HORUMARIKARO WAXBARASHO WAX-KU-OOL AH



Cabdiraxmaan Maxamuud Saciid



Xigashada Sawirka: AI

## HORDHAC

Marka la eego dib-u-dhiska waxbarashada Soomaaliya ee dib usoo kabanaysa, isku-dhafka tiknooloojiyadda iyo waxbarashada waa in loo arkaa mid ka baxsan helitaanka qalabka waxbarashada sida shaashadaha oo keliya, Sida ay tilmaamayso hay'adda NFES (Norwegian Formation Evaluation Society), isku-dhafka tiknooloojiyadda iyo waxbarashada wuxuu ku saabsanyahay ku daridda qalabka iyo hababka tiknooloojiyadda ee hawlaha maalinlaha ah ee dugsiyada, jaamacadaha iyo goobkasta oo waxbarasho. Sidoo kale, ISTE (International Society for Technology in Education) waxay qeexaysaa in is-dhexgal wax ku ool ahi uu dhaco marka tiknooloojiyaddu noqoto qayb dabiici ah oo ka mid ah habka waxbarashada, taas oo ka caawisa ardayda inay fahmaan xogta oo ay xalliyaan dhibaatooyinka.

Arrinta muhiimka ah waxay tahay sida macallimiinta Soomaaliyeed kor loogu qaadi karo heerkooda wacyi oo si fudud loo gaarsiin karo fahamka isku dhafka tiknooloojiyadda iyo waxbarashada (Integration of Technology and Education) ilaa heer ay si firfircoon u wadaagaan oo ay u qiimeeyaan isticmaalka tiknooloojiyadda. Inkasta oo heerarka caalamiga ah ay muujinayaan isticmaal sare oo qalabka aasaasiga ah, haddana u isticmaalka xeeladaysan ee tiknooloojiyadda dhanka waxbarashada ayaa weli hooseeya marka la eego nidaamka waxbarashada Soomaaliya.

## DIB-U-EEGIS ISKU DHAFKA TIKNOOLOOJIYADDA IYO WAXBARASHADA

Qaabkan waxbarasho wuxuu ku dhisanyahay laba aragti oo muhiim ah, kuwaas oo kala ah "Diffusion Theory" iyo "Technological Pedagogical Content Knowledge (TPACK)", Diffusion Theory waxay sharaxaysaa sida hal-abuurnimada ay bulshada ugu faafto, iyadoo tilmaamaysa in dadka ay ku kala duwan yihiin heerarka ay u qaataan tiknooloojiyadda cusub. Soomaaliya gudaheeda, rabitaanka isbeddelka iyo qanacsanaan la'aanta nidaamka jira ayaa dardar gelin kara qaadashada habkan cusub oo ah isku dhafka tiknooloojiyadda waxbarashada.

Dhanka kale, qaabka "TPACK" wuxuu muujinayaa in baris wax ku ool ah ay ku xirantahay isku-darka saddex arrimood oo kala ah aqoonta maaddada, habka baridda, iyo tiknooloojiyadda.

Isku-darka saddexdan ayaa horseeda baris tayo sare leh, maadaama macallinku uu awood u yeesho inuu si habboon u adeegsado tiknoolajiyada si uu u gudbiyo mawduuca.

## XAALADDA WAXBARASHADA SOOMAALIYA

Xaaladda hadda ee waxbarashada Soomaaliya waxay muujinaysaa isbarbardhig u dhexeeya isticmaalka qalabka aasaasiga ah iyo kuwa horumarsan. Inkasta oo isticmaalka qalabka sida "projector"-ka iyo software-rada xafiisyada uu sarreeyo, haddana u isticmaalka tiknooloojiyadda horumarsan ee dhanka waxbarista ama barashada ayaa aad u hooseeya. Tani waxay muujinaysaa baahida loo qabo in la xoojiyo xirfadaha macallimiinta iyo in la horumariyo kaabayaasha tiknooloojiyadda.

Caqabadaha ugu waaweyn waxaa ka mid ah farqiga xirfadda, kaabayaasha aan degganayn, iyo la'aanta qorshe istaraatiiji ah oo mideeya hay'adaha waxbarashada. Arrimahan ayaa si weyn u xaddidaya horumarka iskudhafka tiknooloojiyadda iyo waxbarashada dalka.

## FAA'IIDOOYINKA ISKU-DHAFKA TIKNOOLOOJIYADA IYO WAXBARASHADA

Isku-dhafka tiknooloojiyadda iyo waxbarashada wuxuu leeyahay faa'iidooyin badan oo ay ka mid yihiin kor u qaadidda barashada firfircoon, horumarinta falanqaynta fikirka, iyo yareynta farqiga u dhexeeya magaalooyinka iyo miyiga. Tani waxa micnaheedu tahay in qofku meel kasta oo uu joogo, uu fursad u helayo inuu wax la barto dad kala duwan oo meelo kala duwan jooga.

Marka tiknooloojiyadda la adeegsado, ardaydu ma aha oo kaliya dhagaystayaal, balse waxay noqdaan kuwo si firfircoon uga qayb qaata casharada. Tani waxay kobcisaa xiisaha barashada, waxayna sare u qaadaa awoodda ardayga ee fahamka iyo xusuusashada macluumaadka.

Sidoo kale, tiknooloojiyaddu waxay xoojisaa horumarinta fikirka falanqaynta (critical thinking), maadaama ardaydu ay helaan ilo kala duwan oo macluumaad ah, isla markaana ay bartaan sida loo kala saaro xogta saxda ah iyo tan khaldan. Tani waxay

ka dhigeysaa ardayga mid awood u leh inuu si madax-bannaan u fikiro oo u go'aan qaato.

Intaa waxaa dheer, adeegsiga aaladaha sida "Google Workspace" wuxuu sahlaa in macallimiintu ay abuuraan jawi waxbarasho oo casri ah oo isku xira ardayda iyo macallimiinta meelo kala fog. Tani waxay si gaar ah faa'iido ugu leedahay meelaha miyiga ah ee aan helin adeegyo waxbarasho oo buuxa.

Tiknooloojiyadda waxay fududeysaa wadaagista agabka waxbarasho iyadoo la adeegsanayo meelo kala duwan sida "Google Drive" iyo "Google Classroom", taas oo ardayda siinaysa fursad ay si joogto ah u helaan casharradooda, dibna u eegaan marka ay u baahdaan. Iyadoo laga duulayo faa'idooyinkaa aynu soo sheegnay waxaa si buuxda loo oran karaa isku-dhafka tiknooloojiyadda iyo waxbarashada waxay horseedi kartaa waxbarasho loo simanyahay (equitable learning), maadaama uu meesha ka saarayo xannibaadaha juqraafiyadeed isla markaana uu arday kasta siinayo fursad uu ku gaaro aqoon tayo leh, iyadoo aan loo eegin halka uu joogo ama duruufihiisa nololeed.

# QAAB-DHISMEEDKA LAGU HORMARINKARO ISKU DHAFKA TIKNOOLOOJIDDA IYO WAXBARASHADA

Si loo gaaro isbeddel nidaamsan, waxaa muhiim ah in la qaato qaabab kala duwan sida "RIPPLES", kaas oo isku dara dhammaan arrimaha muhiimka ah ee lagama maarmaanka u ah guusha. Qaabkan wuxuu diiradda saarayaa maalgelin joogto ah, horumarinta kaabayaasha, tababarka dadka, dejinta siyaasado cad, kobcinta barashada, qiimeynta natiijooyinka, iyo bixinta taageero joogto ah.

Isku-dhafka tiknooloojiyada ma ahan keliya arrin qalab; waa arrin hoggaan iyo sinnaan. Guusha dhabta ahi waxay u baahantahay isku-dubarid u dhexeeya hab-baridda, kaabayaasha, iyo siyaasadaha hay'adaha.

Manhajyada iyo nidaamyada qiimeynta waa inay la jaanqaadaan xirfadaha dijitaalka ah ee la doonayo, haddii kale tiknooloojiyaddu wax weyn ma beddeli doonto.

Marka aan u sii soconno xilli ay AI (Artificial Intelligence) hoggaaminayso, waa inaan diiradda saarnaa dadka, macallimiinta taageerada helaya ayaa ah kuwa keliya ee u beddeli kara qalabka albaab waxbarasho.

# TALO-BIXIN

1. **Horumarinta Xirfadaha Macallimiinta (Focus on TPACK):** Waa in aan macallimiinta lagu tababarin keliya sida loo isticmaalo kombuyuutarka, balse la baro qaabka TPACK—sida la isugu xiro aqoonta maadada (Content), habka barista (Pedagogy), iyo aaladaha tiknooloojiyadda (Technology), isla markaana macallimiintu waa in laga caawiyo inay ka guuraan isticmaalka qalabka aasaasiga ah (sida Projector-ka oo keliya) loona gudbiyo isticmaalka xeeladaysan ee ardayda ka dhigaya kuwo firfircoon.

2. **Dhisidda iyo Xoojinta Kaabayaasha (Focus on RIPPLES):** Dawladda iyo hay'adaha waxbarashadu waa inay u qoondeeyaan miisaaniyad gaar ah dhisidda kaabayaasha tiknooloojiyadda (internet xawaare leh, koronto isku halleyn leh, iyo qalab tayo leh), sidoo kale Si loo gaaro "Waxbarasho loo simanyahay," waa in mashaariic gaar ah laga hirgeliyo deegaannada miyiga ah si ardayda halkaas joogta ay u helaan fursadaha ay haystaan kuwa magaalooyinka ku nool.

3. **Dejinta Siyaasado iyo Istaraatiijiyado Midaysan:** Waa in la helo nidaam mideysan oo hagaya sida tiknooloojiyadda loogu dhex darayo manhajka qaranka, si uusan dugsi kasta ama jaamacad kasta ugu dhaqmin si gaar ah oo aan nidaamsanayn.

   - Habka Qiimeynta: Waa in la beddelo habka imtixaannada iyo qiimeynta ardayda, iyadoo lagu darayo xirfadaha dijitaalka ah iyo falanqaynta fikirka (critical thinking).

4. **Kor u qaadidda Barashada Firfircoon (Active Learning):** Dugsiyada iyo jaamacaduhu waa inay si buuxda u isticmaalaan aaladaha sida "Google Workspace", "Google Classroom", iyo mareegaha kale ee u oggolaanaya ardayda inay wada shaqeeyaan (collaboration) xilli kasta iyo meel kasta.

5. **U diyaar-garowga Tiknooloojiyadda Cusub (AI):** Maadaama dunidu u guureyso dhanka garaad gacmeedka (AI), waa in manhajka iyo macallimiintuba u diyaar garoobaan sidii garaad gacmeedka loogu isticmaali lahaa si anshax leh oo kor u qaadaysa barashada, halkii laga baqi lahaa. Waa in mar walba maskaxda lagu hayaa in tiknooloojiyaddu tahay "qalab" fududeeye ah, balse "macallinku" uu yahay hoggaamiyaha isbeddelka. Taageerada macallinka ayaa fure u ah guul kasta.

6. **Dabagalka iyo Qiimeynta Natiijooyinka:** Waa in si joogto ah loo qiimeeyaa saameynta tiknooloojiyaddu ku leedahay fahamka ardayda, Haddii qalab la rakibay balse aanay jirin natiijo waxbarasho oo isbedeshay, waa in dib loo eego habka loo adeegsaday.

## GUNAANAD

Gebagabadii, tiknooloojiyadu ma aha wax lagu daro nidaamka waxbarashada, balse waa qayb muhiim ah oo isku xirta habka baridda iyo nuxurka waxbarashada. Si Soomaaliya u gaarto horumar waara, waxaa lagama maarmaan ah in laga gudbo heerka waxbarista/waxbarashada soo jireenkaa loona gudbo heer is-dhexgal buuxa oo tiknooloojiyadeed. Tani waxay u baahantahay dadaal wadajir ah oo ka yimaada dowladda, hay'adaha waxbarashada, iyo macallimiinta.









































**Website**: https://maragnews.com/

**Email**: editor@maragnews.com

MAJALLADDA
MARAG